JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

XAFIISKA MANAAHIJTA

# BARBAARINTA IYO CILMIGA BEESHA

## FASALKA LIXAAD



# BARBAARINTA
# IYO
# CILMIGA BEESHA

## FASALKA LIXAAD

## 6



Jaalle Maxamed Siyaad Barre

Xoghayaha Guud ee X. H. K. S. ahna Madaxweynaha J. D. S.

**Buggan lama daabacan karo**
**waxaa lagu daabacay**

Madbacadda Qaranka
Xamar, 1976

## TUSMO

Mideynta Ummadda Soomaaliyeed . . . . . . . . 8

Dullaankii gumeysiga iyo dhaqdhaqaaqyada gobannima-doonka . . . . . . . . . . . . . . 21

Midabtakoorka . . . . . . . . . . . . . . . 25

Qabyaaladda . . . . . . . . . . . . . . . 36

Sahyuuniyadda Caalamiga . . . . . . . . . . . 40

Ummadaha Midoobay . . . . . . . . . . . . . 46

Hantiwadaagga cilmiga ku dhisan . . . . . . . . 58

Iskaa wax u Qabso . . . . . . . . . . . . . 63

Canshuuraha . . . . . . . . . . . . . . . 72

Meelaha laga kordhisto aqoonta guud . . . . . . . 75

# MAHADNAQ

Waxaan u mahadnaqaynaa qorayaashii kitaabkan oo ah:

Moxamed Cali Cabdikariin,
Cabdirasaaq Cali Cusmaan,

Waxaa isku dubariday:

Maxamed Cali Warsame,
Ibraahim Moxamed Abyan.

Waxaa kaloo mahadnaq leh dhammaan dadkii kale ee suura geliyay soo saaridda kitaabkan oo ay ka mid yihiin garaacayaashii garaacay.

**Xafiiska Manaahijta**

# GOGOLDHIG

Maaddada barbaarinta iyo Cilmiga Beesha waa maaddo ku cusub Manhajka waxbarashada dalkeenna Soomaaliya. Maaddadu waxay ka mid ahayd arrimihii badnaa ee muhimka wada ahaa ee ka maqnaa waxbara shada iyo barbaarinta, gaar ahaan iyo guud ahaan dalka oo dhan Kacaanka ka hor; waxayna la dhalatay KACAANKII 21da ee Oktoobar, 1969. Sababta ay ula dhalatay Kacaanka waxay ahayd; Kacaanka baahi baa dhalisay, keentay, wuxuuna u dhashay inuu xaqiijiyo ujeeddooyinka Ummadda iyo inuu fuliyo Banraamijka loogu tala galay in lagu hirgeliyo ujeeddooyinkaas.

Hirgelinta ujeeddooyinka iyo Barnaamijku waxay u baahnaayeen **dad**, runtii, gartay oo aaminsan . . . . . .Dad baahidooda gartay, aaminsan oo u diyaar ah, niyo garasho iyo falid ahaanba, inay u hawl galaan oo u dhintaan. Taasi waxay u baahan tahay «Barbaarin ujeeddo leh». Maaddadaani waxaa weeye jid cusub oo aynu ku doonayno inaan ilmaha ku siinno **ABUUR SOOMALIYEED**, nuguur (dabeecad iyo akhlaaq toosan, fikrad horusocod ah, damiir fayoow iyo ildheeri siyaasi ah, si ay ku yeeshaan berri qofnimo suuban; Maaddadaanina waxay inoo horseedaysaa inaan abuuro mujtamac dadkiisu qiyamkaas leeyiihiin.

Runtii, innagu intaasoo dhan ma wada siin karno ilmaha, maxaa jira intooda badan waxay ka mid yihiin nuguurtiisa (dabeecaddiisa) asalka ah. Hase yeeshee, innaga shaqadeennu waxay tahay inaan barbaarinno, korrinno, kordhinno oo qaabinno nuguurta uu ilmuhu ku dhashay (in-born qualities). Sida cuntadu, biyuhu, qoraxdu iyo hawadu u barbaariyaan (u koriyaan) Nafleyda (dadka, xayawaanka, geedaha iwm.) ayey waxbaridda iyo barbaarinta saxa ahi u siiyaan qofka korriimo caqli, caadifo iyo jir. Macnuhu waxaa weeye, qofnimada waxa isla sameeya; nafaqada, aqoonta (barbaarinta) iyo dhaqanka, ama nolosha ku wareegsan ee uu ku dhex nool yahay. Qofnimo waxaan ula jeedna nuguurta (anshaxa iyo kartida) qofka looga sooco dadka dakale. Qofnimadu waa sida qofku u dhaqmo iyo siduu u fakaro: waxa la xun iyo waxa la fiican, waxa uu macaansado iyo waxa la kharaar.

Waxaa la yiraahdaa, nuguurta ilmaha marka ay dhashaan waa «dhexdhexaad» (neutral). Laakiin marka dambe waxay u dheeliyaan dhinaca loo barbaariyo inta ay yar yar yihiin. Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa: «Caruuri gaalo iyo muslim midna ma aha ee waa kii lagu daraa»; haddaba, waxaa la oran karaa ilmuhu marka ay yar yar yihiin oo ay da'daas ku jiraan (ilaa 9sano) ayey qofnimadoodu «tallaalantaa». Sidaas awgeed, waxaa inala gudboon, haddii aan nahay barayaalka iyo barbaariyeyaalka, inaan xooggeenna isugu geyno barbaarinta dhallaanka oo aan ku tallaalo nuguurta iyo tilmaamaha aan la doonayno ilmaha. Taasi waa xilka ay Ummaddeennu ina ku aamintay; Maaddadaanina waa jidka ina ku kaalmaynaya sidii aan xilkaas uga soo bixi lahayn.

Waxbaridda iyo barbaarinta waxay, had iyo goor, yihiin kuwa qofnimada xumaanta ka gooya, uguna beddela wanaag. Waxay siiyaan dadka qalab mid muuqda iyo mid aan muuqangayeysiiya inay ku hagaajiyaan noloshooda, kuna daaweeyaan dhibaatooyinka hadba mar la soo gudboonaada, si ay ula socdaan isbeddelka taariikhda. Marka, barbaarintu waa mid aannu ku doonayno qofnimo wanaagsan oo karti leh. Waxaa isweydiin leh, qofnimadu ma wax taagan baa? Mise maya? Professor Mauric, Ameerikaan, wuxuu inoo sheegay «waxa qofka noqonayaa waa inuu noqdaa «**ISBEDDEL SOCONAAYA OO JOOGTA AH**, oo la socdaa isbeddelka taariikhda isbeddelkaasi sidee u yimaadaa? Waagii kasta, meeshii kasta iyo wixii kastaba wax baa kaaga siyaada. Qofkii aad la kulantidba waa kuu adduun cusub! Sidoo kale, shaygii (Liis, matalan) aad aragtidba. wuxuu ku siiyaa aqoon hor leh. Haddaba, weligaa isbeddel baad ku jirtaa. Qofka gaarka ah iyo aqoonta uu ka helayo dibeddiisa ayaa soo saara qofnimada gaarka ah ee qofka ku jirta. Haddii qof kastaa qof kale iyo shay kale uu wax ka baranayo, si uu qofnimo gaar ah u yeesho, waxa waajib ah in qof kastaa iyo shay kasta hagaagsan yahay, illeyn iyagaa qofnimada abuuree.

Danta laga leeyahay barbaarinta iyo cilmiga beesha waxaa weeye in lagu hagaajiyo qofka, qofkuna, markiisa, qof kale iyo shay kale ku hagaajiyo si degaanka oo dhan, dad iyo duunyo, u hagaago.

Qofnimo wanaagsani ma soo baxdo ayadoo aan debedda laga qorin (laga barbaarin). Qofka waxaa dadnimaddiisa dhisa milka hagaagsan waxa abuuri kara «Macallin wanaagsan». Maxaa jira, waa macallinka qofka u gudbiya dhallanka mujtamaca runta iyo qiyamka toosan ee keena macaamilka beesha ee isla noolaanta iyo isjecaylka; qofkuna sidiisa wuxuu u jiraa ama u joogaa qof kale daraadii. Albert Bawbar ayaa arrintaas si cad u sheegay markuu yiri; (I-Thou), «aniga-Aidga». Anigu waa adiga, adiguna waa aniga. Anigu waxaan u joogaa adiga daraadaa. adiguna waxaad u joogtaa aniga daraaday. Adigu ma jirteen aniga la'aantay! Aniguna sidoo kale ma jireen adiga la'aantaa. Xikmaddaasi qiimo weyn bay in ooleedahay, innaga la'aantaa. Xikmaddaasi qiimo weyn bay inoo leedahay, ga Barbaariyeyaalka ah. Maxaa jira waxay inoo sheegaysaa in qiimaha qofku yahay qofka kale wuxuu ka helay.

Laba wax oo waaweyn ayaa qofka, gaar ahaan macaallinka, ama dugsiga ka helaa: run cilmi ah iyo qiyam. Cilmigu qofka ma abuuro, laakiin qofka ayaa abuura cilmiga. Qof kasta ma abuuro.

Waxaa abuuri kara qofka leh qiyamka wanaagsan; tarbiyadduna waa jidka lagu abuuro qof qiyamkiisu hagaagsan yahay si uu cilmi u sameeyo. Cilmina sidiisa waa la wade (Value guided). Hadaba Maaddada barbaarinta iyo Cilmiga beesha waa hooyada culuumta kale. Waxaa la oran karaa culuumta kale waxay u shaqaysaa Maaddaadaan, maxaa jira waxay dhisaysaa qofnimo, culuumtuna waxay u shaqaynaysaa qofka, qofkaana keena. Taasi waxay run noqon kartaa marka macallinku garto fartiintiisa ah tarbiyadda.

Run ahaan, qiyamku ma aha wax guud oo dunidoo dhan ka dhexeeya (Universal). Laakiin, mujtamaca dadka dunidu waa kala duwan yihiin. Waxyaalaha ay ku kala duwan yihiin waxaa ugu weyn; dhaqanka iyo nidaamka (system) dhaqaalaha. Mujtamac kastaa wuxuu leeyahay dhaqan iyo nidaam dhaqaale oo u gooniya iyo nidaam uu rabo inuu dhaqaalihiisa ku dhiso; muujtamac kastaa dadkiisa wuxuu ku barbaariyaa si wa afaqsan dhaqankiisa, siyaasadiisa, dhaqaalihiisa, iyo siduu ka rabo ayatiinkiisa dambe.

Sidaa daraadeed, innagu waxaan leenahay dhaqan gaar ah (Islaami ah) iyo nidaam aan doonayno inaan dhaqaaleheenna ku dhisno (Hantiwadaag iyo ujeedooyin fog. Maaddada barbaarinta iyo Cilmiga beesha waa inay noqotaa mid waafaqsan oo u shaqaysa dhaqankeenna, siyaasaddeenna, dhaqaaleheenna iyo ujeeddadeenna fog.

Kitaabkaani waa kan 6aad ee Maaddada barbaarinta iyo cilmiga beesha waxaa loogu tala galay Fasalka 6aad, Dugsiyada dhexe, Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyaa. Ardayda ku jirta Fasalkaan da'dooda, Caqligooda iyo garashaddoodaba way koreen oo waxay gaareen heer ay nolosha u bixi karaan, waxay leeyihiin shan sano oo waxbarasho ah iyo 13-15 sano oo waayo-aragnimo ah. Waxay ka mid noqon karaan dabaqadda aqoonta leh dalkeenna dadkiisa wax yaqaani ay yar yihiin. Waxaan filaynaa in ardaydaasi gaareen heer ay wax baran karaan wax isbari karaan, ra'yina la bixi karaan oo ay doodaha qaarkood ka qayb geli karaan. Waxaa aad u wanaagsan in casharada Buugga ku qoran iyo kuwa dheeraadka ah ee uu macallinku siin karo ardayda loo baro loogana doodo sii barbaarin leh oo **«kaadhigan»** ah (Objective).

Casharada Buuggaan maahee, ardaydu waxay qaadan karaan aqoon guud oo dheeraad ah, aqoon ka baxsan Buugga. Waxay nala tahay in loogu dadaalo sidii aqoontaas dheeraadka loo siin lahaa. Aqoontaas guud, had iyo jeer waa inay ahaataa mid waafaqsan barbaarinta Ummaddeenna. Horay waxaan u soo niri qofka iyo degaanka ijtimaaciga ah ee uu ardaygu ku dhex nool yahay waxay ku jiraan isbeddel, wax meeshoodii taaganna ma jiraan. Waa in lala socodsiiyaa ardayga isbeddelka joogtada ee ka socda dalkiisa iyo dunida kaleba, ayadoo loo sharaxayo sababta isbeddelka kastsa keentay, waxaa ka soo baxay iyo raadkuu reebay. Waxaa kaloo faa'iido leh in la baro ardayda doodda, sida laysu cabbiro iyo sida wax laysu dhacsiiyo.

Waxaa caada ah had iyo jeer in inta aan la bilaabin muqqararka sannadkaan, la dul maro casharadii ardaydu ku soo qaateen Fasalka shanaad, gaar ahaan casharada Ummadaha Midoobay (U.N.O.) xilliyadii taariikhda Bulshada Aadamigu soo martay, iyo Iskaa Wax U Qabso. Casharada Buuggaan ku qo-

ran dhammaantood waa wada muqarar, laakiin waxaa muhim ah qaybaha! Mideynta Ummada Soomaaliyeed, canshuuraha, hantiwadaagga iyo Iskaa Wax U Qabso. Casharka Iskaa wax u qabso waa in si wanaagsan loogarto ardayda loo qayb siiyo. Iskaa Wax U Qabso Waxaa loo qabaa inay tahay wax iska ah shaqo, laakiin waa «fikrad» lagu dhisayo Ummad.

Maaddadaan marka la dhigayo, oo ilmaha la barayo, waa inayan ku koobnaan casharada Buugga ku qoran oo kaliya. Mar kasta waxaa soo kordha arrimo cusub, waxaa dhaca isbeddel. Waxaa la yiraahdaa «waagii beryaba geddiisa (xaalkiisa) leh». Haddaba, waa in ardayda lala socodsiiyaa hadba waxa soo kordha iyo isbeddelka dhaca. Waxaa kale oo aad wax kuu taraya, haddii aad tahay macallinka Suugaanta iyo Hiddaha Shacabkeenna Soomaaliyeed. Taas dambe aad bay muhim u tahay maxa jira, waxa aad dhallaanka aamminsiinaysid waxaa ugu weyn dhaqanka iyo danta Ummaddooda. Marka, wax kasta oo la barayo waa in lagu baraa ama loogu soo gabbadda dhaqankooda iyo suugaantooda, kuwaa oo ah ruuxa Ummadda. Ilmuhu waa inay noqdaan ruuxa Ummaddooda ee dhaqdhaqaaqa, iyo caqligeeda fakara iyo aydiyoolojiyadeeda wax dhista.

Darsi kasta marka la bixinayo, waxaa waajib ah ni lagu dhaqmo ama la raaco jidka (Method) soo socda:

1. Marka casharka la bilaabo, ilaa marka uu dhamaado, waa in ardaygu si nool (actively) uga qayb galaa casharka, macallinkana waxaa waajib ku ah inuu ardaydiisa ka qayb geliyo casharka uu bixinayo. Waxa aad doonaysid inaad ardayda u sheegtid, ama bartid, marka hore, weydii ardayda . . . ka doon jawaabta inay helaan dabadeedna si tifaftiran ugu sharax.

2. Isku day inta aad kari-kartid in casharku noqdo mid xiisa leh oo ardaydu ayan ka xiso dhicin. Haddii ardaydu cuqdo k aqabto waa ka xiisa dhacayaan casharka iyo xataa adiga barahaba. Weligaa kici xiisaha ardayda, shuqli ardayda oo maskaxdooda ka shaqaysii.

3. Waxaad ardayda xiisahooda u kicin kartaa, casharkaagana uga dhigi kartaa, mid la fahmo oo la yaqaan, marka

isticmaashid qalabka dadka wax lagu baro (Visual Aids). Ururso marka hore, qalab ku kaalmeeya marka aad cashar kasta bixinaysid — waa muhim.

4. Cashar kasta fikrad, ama fikrado asaasi ah ayaa ku jira iyo ujeeddada laga leeyahay fikradahaas, bar ardayda fikradda iyo ujeeddada laga leeyahay. Hubso oo sug inay fahmeen oo qaataan.

5. Casharadu waa inay isku xirxiriirsan yihiin oo isku dhisan yihiin. Isugu xeji casharada sida ay isu leeyihiin oo isugu dhow yihiin, isuna raaci karaan.

6. Cashar kasta marka uu dhammaado, waa in ardayda la siiyaa layliyaal ay kaga shaqeeyaan dugsiga dhexdiisa iyo debeddiisaba. Waxaa jira layliyaal aan ku soo qornay gololo (Mawduuc) kasta dhammaadkiisa, layliyaalkaas waa tilmaan. Isticmaal iyaga iyo kuwo aad ka soo dhex saartid cashar kasta.

Waxaan ka cudur-daaranaynaa, haddii ay jiraan wax gefaf ah ama nuqsaan ah oo aad ka aragtaan Buuggan guud ahaan. Shaqada qoraalka buuggu waxay ahayd deg-deg, waana markii ugu horreeysay oo la allifo buug noocaan ah (Buuggu Maaddada barbaarinta iyo Cilmiga Beesha).

Waxaana waajib ah inaad wixii gef ah ama qalad ah oo aad aragtaan jaallayaal, la socod-siiya Xafiiska Manaahijta ee Wasaaradda waxbarashada iyo Barbaarinta.

Waxaan ku han weynahay in buugan noqdo mid danihii laga lahaa keena, ardayda Soomaaliyeedna faa iido u yeesha.

«Eebbe ha ina waafajiyo».

**Qorayaalka Buuggaan**

Casharka 1aad

# MIDEYNTA UMMADDA SOOMAALIYEED

## 1. Midnimada Ummadda Soomaaliyeed:

Ummadda Soomaaliyeed waxay ka mid tahay Ummadaha eebbe u dhammeeyey tilmaamaha midnimada. Soomaaliya waxa u dhan tiirarka ummadnimada oo idil. Tiirarka ummad isu keena oo mid ka dhiga waxaa ugu waaweyn:

Afka, Diinta, dhalashada, shucuurka, taariikhda, dhaqanka iyo hidaha iyo yididiilada. Dadka Soomaaliyeed meel kastaba ha joogeene, waa wada wadaagaan dhammaan tiirarkaas mideeya ummada. Meel kasta oo aad tagtid dalka Soomaaliya, laga billaabo raas-xaafuun ilaa hawas, ama Siyallow ilaa qooriga Tajoorre, ma arkeysid wax weynoo iskhilaaf ah oo dadka Soomaaliyeed; waa isku af, isku diin, isku dhaqan iyo taariikh oo soo texnaa ilaa kumayaal Sanno.

Midnimada cayn kaas ahi waxay u soo jiiday Soomaaliya faa'iidooyin badan, oon ka tilmaamayno saddex arrimood:

1. Shucuurka, dareenka iyo danqashada oo iskusi u saameynaya, laabtoodana kicinaysa, kolkii gurmad loogu yeero oo uu cadow soo weeraro meel ka mid ah dalka Soomaaliyeed ee weyn. Taas waxay keentay in ay ummadda isku meel ka soo wada jeesata, oo ay cadawga lawada dagaalamaan, waxaa taas daliil u ah:

b) Qarnigii 16 aad markii cidamada isbahaystay ee Amxaarada iyo Burtuqiiska ay ku soo duuleen Soomaaliyada galbeed, ummadda dhammaanteed waa isu soo habarwacatay, meel kastana waa ka soo ciidameen, waxayna ka sinnaayeen carada iyo danqashada, gooba badan oo dagaalkaas ka mid ahaana way ku guuleysteen.

t) Sidoo kale qarnigii 19 aad markii gumeysigii Yurub dalkeena soo galay, dadka Soomaaliyeed shucuurta wey wada gaartay. Xeebaha, Babera, Qandala, Hobyo, Marka iwm. oo uu gumeysigu ka soo dagay, um-

maddii waxay kala hortagtay dagaal, wuxuuna ka mid ahaa dagaalada ugu waaweyn ee Afrika gumeysi lagala hortago, uguna dhiig badnaa. Dadka taariikhda qora qaarkood waxay qiyaas ku bixiyeen: in tira dhan hal Malyan oo Qof ku dhinteen dagaaladii daraawiishta iyo dagaaladii la midka ahaa ee ka dhacay Banaadir (Marka iyo agagaarka Jowhar).

j) Dagaalkii labaad ee dunida dhexdiisii 1943dii, kolkii uu billawday dhaqdhaqaaqii gobannimadoonka, dadadka Soomaaliyeed dhammaantood meel kastaba ha joogeenee, waxay ka qaybgaleen Halganka uu u horseedayey **XISBIGA** (Leegada), waxaana laga furay meel kasta, ummadda Soomaaliyeedna meel kaliya ayey ka soo wada jeesatay, iyagoo ka danqanaya gumeysiga, dagaal kululna waxay ku qaadeen gumeysiga ilaa gobannimo laba waaxood ay gaareen.

2. Diinta Islaamka oo iyadu ah xiriirka aad isugu duuba ummadda Soomaaliyeed, markii ay soo gashay waddanka Soomaaliya, si dhib yar ayay ugu faaftay, loona wada aamminay.

Xertii iyo Culimadii diinta waxay u kici jireen meel alla meeshii ay ka kororsan karaan, kuna faafin karaan cilmiga, xuduud dadka u dhexeysa ma jirin, waddanka Soomaaliyeed oo dhan mid buu ahaa. Xertu iyo culimaduba meeshii ay tagaanba waxay ahayd waddankoodii, reerkii ay u tagaanba wuxuu ahaa reerkoodii, lama kala qalaado. Maxaa jira waa walaalo.

3. Af-Soomaaliga oo ka mid ah tiirarka ay ummadnimada soomaaliyeed cuskantahay markii la qoray isku si ayaa loo wada qoray looguna wada dhawaaqay, looguna wada shaqeystay.

Arrintaas oo marag ka ha in Soomaalidu weligeed mid ahayd, wada daganeed, wada dhaqmi jirtay, af kaliya ay isku fahmaanna yeeshay.

Faa'iidooyinkaas badan ayey leedahay ummadda meel kasta isaga mid ah. Gumeysiga markii uu arkay ummadda sidaas u midka ah wuxuu goosstay inuu ku dadaalo sidii uu u kala fur-

furi lahaa, una qaybqaybin lahaa, si ay ugu sahlanaato qayb waliba inuu si dhib yar u liqo. Isticmaarka wuxuu ku guuleystay siyaasaddisii ahayd kala qaybinta, kala dullaalidda, wuxuu inoo qaybiyey shan meelood kolkii uu arkay inaan la xukumi karin ummadda soomaaliyeed oo sidaas u xoog badan. Ummadda waxay weli u dagaalameysaa sidii ay ku soo ceshan lahayd midnimadeeda iyo ummadnimadeeda.

Intaas aan soo sheegnay waxay tusaale u tahay ummadnimada Soomaaliyeed oo aan marnaba suura gelin in la kala geeyo, ummadnimadaasoo asal ah, oo soo texnaan jirtay, iyo midnimada Soomaaliyeed oo aan la inkiri karin.

**2. Qaybintii dalka Soomaaliya.**

Nacaybka ay u qabeen gumeystayaashu dadka Soomaaliyeed waa mid waligii jirey maantana weli jooga. Haddii aan u fiirsanno maanta xiriirka ka dhexeeya J.D.S. iyo Gumaystayaasha waxaan arkaynaa, in uu aad u taagdaran yahay sabatuna waxay tahay nacaybka ay u qabaan dawladnimaddeenna. Kaas oo dawlada badani ka sinnaayeen qarnigii 16aad. Inkastoo ay ka guulaysan waayeen dadka Soomaaliyeed markaas, hadana markii la soo gaaray qarnigii 19aad barkiisii dambe ayey iyaga oo garabsanaya waaya-aragnimadoodii qarnigii 16aad, waxay darseen dadka Soomaaliyeed. Waxaynu ogaadeen in Soomaalidu halis tahay labadan arrimood ee soo socda awgeed:

1. In dadka Soomaaliyeed uuna marna oggolayn xukunka gumaystayaasha.
2. Gumeysi nacaybkaa Soomaaliduna saamaynaayo dadka dariska la ah.

Sidaas darteed si ay u xukumaan ugana nabadgalaan saameyntiisa dadka dariskiisa ah, ayey gumaystayaashu go'aan ku gaareen shirkii Baarliin — 1884-1885kii inay u qaybiyaan dalka Soomaaliyeed shan meelood, islamarkaasna ayna ugu ogolaanin dadka Soomaaliyeed in ay is uruursadaan mar kale. Ka dib waxay gumaystayaashu xooggoodii isugu geeyeen in ay ku maamulaan siyaasadda ah (qaybi oo xukun) taas oo salka ku haysay qabyaaladda.

Laakiin Dadka Soomaaliyeed marna ma ayna oggolaanin

xukunkooda, mana ayna aqoonsanin qaybintaas, ee waxay had iyo jeer u halgamayeen midnimadooda. Halgankaasina wuxuu aad u soo shaac bxay qarnigan bilowgiisii, casharrada soo soco-da yaan ku tilmaami doonnaa sidii ay dadka Soomaaliyeed ugu soo halgameen midaynta ummadnimo laga bilaabo qarnigii 19aad ilaa taariikhda aan maanta joogno.

## DADKA SOOMAALIYEED SIDA AY UGU SOO HALGAMEEN MIDNIMADOODA

### 3. Halgankii Daraawiishta 1900-1921kii:

Nolosha Soomaalida Qarnigan 20 aad Bilawgiisii: qarnigii 19 aad dhammaadkiisii Gumaystayaashu waxay u qay-biyeen dalka Soomaaliyeed shan meelood, islamarkaasna wa-xay xoogoodii isugugeeyeen si ay u xukumaan dalka, una hor joogsadaan dadka u halgamaayey midentiisa, sida ay u xoojin lahaayeen qabyaaladda, guul bay ka gaareen, maxaa yeelay no-losha dadka Soomaaliyeed waxay ku dhisnayd qarnigan bilow-giisii qabyaalad, waxaana ka dhexeeyey isboob, isdhac iyo dil, gumeysiguna aad ayuu uga raalli ahaa noloshaas foosha xun, maxaa yeelay wuxuu ka cabsanaayey in ay isu ururaano ay kala hortagaan dagaal sidii ay yeeleen qarnigii 16aad maantase, wu-xuu arkay in uu iyaga isku jeediyo tahay waxa kaliya ee la gu-dbooni, in uu isku sii diro oo uu isugu dhiibo hub.

Sidaas ayey ku dhisnayd nolasha Soomaaliyeed markii uu Sayidkii ku soo noqday dalka Soomaaliyeed 1896kii.

### 4. Taariikhda Sayidka:

Sayidku wuxuu ku dhashay meesha la yiraahdo Sacma de-eq ama qobfardood oo ka mid ah gobolka Togdheer-Degmada Buuhoodle, taariikhdu markii ay ahayd 1864kii, isaga oo kuray ah ayaa lagu tilmaami jirey geesinnimo, codkarnnimo, fir fir-cooni, aabihiisana sheekh Cabdille Xasan Nuur, markii uu ku arkay sifaadkaas ayuu ku taba baray samirka, adadayga iyo faras fuulka, Maxamed wuxuu ahaa wiil fahma badan markii uu gaaray sideed jir ayuu aabihii u dhiibay Sheekh degganaa dhulka ay xabashidu maanta haysato, si uu u baro quraanka iyo kutubtaba. Markii uu gaaray 11 jirna quraanka oo dhan wuu qaybay, kutub badanna wuu akhristay. Macallinkiisii markii uu arkay xilkasnimadiisa fahmobadnidiisa, iyo caqlibadinidiisa

ayuu weydiistay in uu ku kaalmeeyo dugsiga, sidaas darteed ayuu subaxdiina ardada wax bari jirey; galabtiina wax akhrisan jirye, markii uu gaaray 19 jirna wuxuu ka mid noqday Sheekhyaha waaweyn, Masaajidda ayuuna kutubka ku akhriyi jirey, markaas ka dibna muddo 10 sannadood ah ayuu u kici L ekhyaha waaweyn, Masaajidda ayuuna kutubta ku akhriyi jirey. Markaas ka dibna muddo toban sannadood ah ayuu u kici jirey kolba meeshii uu wax ka soo kororsan karo, siiba Galbeedka Soomaaliya oo lahayd meel badan oo wax laga barto, markaas ka dibna wuxuu yimid Koonfurta Soomaaliya oo iyana lahayd meelo lagu barto culuunta siiba Xamar, Sayidku oonka uu u qabay waxbarashada, waxay ku khasabtay markii uu dhammeeyey culuuntii Soomaaliya lagu yiqiin oo dhan, in uu u kaco dalka Sucuudiya si uu Xaajka u soo guto, isla markaasna wax uga soo barto, wuxuuna ku negaaday maka iyo Madiina muddo saddex sanadood ah, oo uu wax ka baranaayey, waxaana la socday 13 oo xertiisii ah, wuxuuna saaxiibtinimo la yeeshay oo uu dariiqada saalixiyadana ka qaatay sheekh Maxamed Saalax oo ahaa ninkii asaasay dariiqada saalixiyada. Sayidku markii uu wax ka baranaayey sucuudiya wuxuu arkay farqiga u dhexeeya gobannimada iyo gobannimo laa'aanta, markaas ayuu niyada gashaday in uu wax u qabto dalkiisa, sidaas darteed ayuu xiriir ula yeeshay dawladdii Turkiga si uu uga helo kaalmo, waxaa kale oo uu xiriir la yeeshay kacaankii Mahdigii Soodaan iyo kacaankii Axmed Curaabi ee Masar si uu uga faa'iidaystso waaya-aragnimadooda, soo noqodkiisiina wuxuu ku negaadey Cadan muddo lix bilood ah, wuxuuna yimid Soomaaliya 1885kii, isaga oo ay maskaxdiisa ka buuxdo fikrado kacaannimo ah, sida aan soo sheegi dono:

### 5. Fikradaha Cusub ee uu Sayidkii la Yimid:

Bulsha kasta inkasta oo uu dadkeedu markaas ku nool yahay nolol dibusocod ah, haddana lagama waayo in horusocod ah, sidaas oo kale inkasta oo ay nolosha dadka Soomaaliyeed ku dhisnayd qabyaalad qarnigii hore dhammaadkiisii iyo kan bilawgiisii, hadana, waxaa ku jirey in wanaagsan oo doonaysay in ay u halganto ummadnimada Soomaaliyeed.

Intaas waxaa ka mid ahaa Sayid Maxamed Cabdulle Xasan; Sayidku wuxuu Soomaaliya ka tegay iyadoo la gumeysto,

sucuudiya markii uu wax ku baranayey wuxuu arkay faraqa u dhexeya dadyawga gobannimada haysta iyo kuwa la gumaysto. Markaas ayuu niyadda gashaday inuu wax u qabto dalkiisa, sidaas darteed ayuu xiriir u la yeeshay dawladdii Turkiga soo noqodkiisii wuxuu soo maray Masar iyo Suudan oo uu iyagana la yeeshay xiriir. Wuxuu ku soo noqday Soomaaliya 1895kii isaga oo ay maskaxdiisa ka buuxdo fikrado kacaan ah, oo uu doonayay inuu raadiyo gobannimada dalka Soomaaliyeed. Saiydu wuxuu ka fikiray sida uu ku gaari lahaa yididiilladaas. Wuxuuna ogaaday inuuna marna ka gaari karin si nabadgeliyo ah ee ay lagama maarmaan tahay inuu u galo dagaal dheer, si uu dagaalkaa u galana wuxuu u baahday xoog uu cuskado; wuxuuna ogaaday inuuna marna cuskan karin xoogii qabyaaladda ku dhisnayd, maxaa yeelay qabyaaladdu waxay ahayd qalab uu gumaystuhu ku adeegto. Sayidkuna wuxuu doonaayey inuu ka saaro gumaystayaasha dalka Soomaaliyeed. Haddaba ma u suuroobi kartay Sayidkii inuu kula dagaallamo gumeystayaasha qalabkii iyaga u suura geliyey inay ku gumeystsaan dadka Soomaaliyeed? Jawaabtu waxay tahay, maya. Dhinac kalena qabyaaladdu waa shar, gobannimaduna waa khayr, shar iyo khayrna marna ma kulmaan. Waxyaalahaas oo dhan ayaa Sayidkii ku khasbay in uu fikiro sidii uu u dhisi lahaa xoog uu cuskado, kaas oo ka duwan kuwii hore, xoogan cusubi kuma uu dhisna abtirsiino sidii kuwii qabyaaladda ku dhisnaa ee wuxuu ku dhisan yahay dad isku fikrad ah isku ujeedo ah, dad isku dhaarsaday in ay u halgamaan mideynta ummadda Soomaaliyeed xooggaas cusub waxa lagu magacaabay daraawiish.

**6. Dhismaha Daraawiishta:**

Sida uu Sayidku u dhisay ciidanka Daraawiishta aad ayey u qiima weyneyd, waxayna la mid ahayd sida loo dhiso xisbiyada maanta horusocodka ah, maxaa yeelay markii Sayidkii yimid Magaalada Berbera, oo ay dantu ku khasabtay dhisidda ururka daraawiishta, wuxuu si deg-deg ah xiriir u la yeeshay dadki wax garadka ahaa, kuwaas oo ah culimada diinta, xerta iyo ardayda, intuuna ururiyey ayuu u bilaabay kutubta iyo quraanka, isla markaasna fikiradihiisa ayuu ka dhaadhicin jirey, siiba wixii ku saabsan macnaha madaxbannaanta sida ay diinta islaanku ugu oggolayn dadka muslinka ah in ay u hoggaansamaan gumeysiga, afkaartaas tawriga ahi si dhakhsa ah

ayey ugu faaftay dadkii reer Berbera, daraawiishtiina aad ayey u badatay.

Markaas ayuu Ingiriiskii ku bilaabay daraawiishtii cadaadis si uu u bakhtiyo dabkooda Kacaanka ah. Sidaas awgeed ayey Daraawiishtii uga tageen Berbera oo ay u kaceen miyiga. Markii ay miyiga tageena waxaa si deg-deg ah ugu soo biiray daraawiishta dhallinyaradii wax baranaysay iyo dad kale oo badan. Markii uu qofku ka mid noqdo daraawiishta isla markaasna xoolihiisu waxay ka mid noqonaayeen xoolaha daraawiishta, oo iskaashato kale ahaa.

### 7. U Tabaabusheysigii Dagaalka.

Sayidkii markii uu hubsaday dhismaha Ururka daraawiishta oo uu ogaaday in uu yahay xoog uu cuskan karo ayuu u darbay daraawiishta sidii ay dagaalka u geli lahaayeen, wuxuuna qaaday tallaabooyinka soo socda:

1) Hub urursi nidaamsan.
2) Dhisitaanka ciidan nidaamsan siiba kuwa ku dagaalama fardaha.
3) Barista ciidanka tabaha dagaalka siiba weerarka iyo gaashandhigga.
4) Wuxuu xiriir la yeeshay ganacsatada carabta si ay ugaga soo dejiyaan hubka dekedda Berbera iyo Saylac.
5) Wuxuu ka sameeyey buuraha meelo lagu ururiyo hubka oo ay dad yari ogyihiin.
6) Wuxuu uga dhisay degmooyinka daraawiishta hab difaac.
7) Wuxuu qoday ceelal fara badan siiba meelaha ku xigay soohdinta Ingiriiska iyo Talyaaniga.
8) Wuxuu u dirtay dalalka Carabta ergo u soo ururisa hubka iyo daawada.
9) Wuxuu u qaybiyey ciidanka daraawiishta sida soo socota:

b) Ciidanka Waqooyi, kaas oo ka soo horjeeday ciidanka Ingiriiska.

t) Ciidanka Koonfureed, kaas oo ka soo horjeeday ciidanka Talyaaniga.

j) Ciidanka Galbeed, kaas oo ka soo horjeeday ciidanka Xabashida, isla markaasna ka ilaalinaayey daraawishta dhabarjebiska.

8. **Ku Dhawaaqii Jihaadka 1899kii «Cuskashada Diinta Islaamka»**

Sida aan horay u soo sheegnay ayuu Sayidkii ugu darbiyey daraawiishtii in ay galaan halganka dheer ee xorayнта dalka Soomaaliyeed Isla markaasna wuxuu ogaaday in ay lama huraan tahay in ay dadka Soomaaliyeed oo idili ka qayb galaan halganka. Sayidku wuu dersey bulshada Soomaaliyeed, wuxuuna ogaaday in ay Diinta Islaamku tahay xariga ugu weyn ee isku xira dadka Soomaaliyeed. Sidaa awgeed, wuxuu xiriir deg-deg ah la yeeshay culimada diinta iyo dadweynahaba, isaga oo faraya waajibka dusha ka saaran ee ay farayso diinta islaamku, markaas ayuu ku dhawaaqay in lagu qaado gumeystayaasha jihaad. Wuxuuna socday muddo 21tan sannadood ah 1900-1921kii, daraawiishtiina si geesinima ah ayey u dagaalameen guulo badana wey gaareen, khasaara badanna wey u geysteen gumeystayaasha. Gumeystayaasha isbahaystay ee ahaa Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Amxaarada markay ka guuleysan waayeen daraawiishtii ayey ku fikireen in ay soo nooleeyaan qabyaaladdii dhimatay, wayna ku guuleysteen, markaas ayuu Ingiriiskii isaga oo taageera ka haysta qabyaaladdii iyo gumeystayaashii aan soo sheegnay wuxuu ku soo qaaday daraawiishta dagaal xoog leh xagga dhulka iyo cirkaba, wuxuuna burburiyey xaruntii daraawiishta Taleex, markaas ayaa daraawiishtii jabtay, Sayidkiina wuxuu silic ugu dhintay isaga oo muraara dillaacsan Magaalada Iimey 1921kii.

Sidaas ayaa daraawiishtii ugu soo halgameen xorayнта iyo mideynta Ummadda Soomaaliyeed mudadaas 21ka sannadood ahayd, iyaga oo si geesinimo ah ugu huray naftoodii.

Haddaba haddii ay daraawiishtii gaari waayeen yididiiladoodii oo ay u halgamaayeen 21ka sannadood, sababtu uma ay noqonayso iyaga ee waxay u noqonaysaa cadawgii dibadda iyo kii gudaha oo isu kaashaday. Sida runta ah daraawiishtu waxay ahayd in yar oo wax garad ah oo ku dhex noolayd in badan oo aan wax la granaynin.

Waxaan ammaan ugu filan daraawiishta in ay si geesinimo ah ugu halgamayeen xoraynta dalkooda 21 sannadood, in uu kacaankoodii ahaa kii ugu horreeyey Bariga Afrika, in ay tuseen dadka Soomaaliyeed hilinkii runta ahaa ee loo mari lahaa mideynta Ummadda Soomaaliyeed.

Sayidkiina waxa ugu filan ammaan in uu ahaa qofkii ugu horreeyey ee isku dayey in uu ka hirgeliyo Afrika oo idil fikrado tawri ah.

Innagana waxaa ina la gudboon inaan raacno jidkii ay daraawiishtii mareen, oo ahaa u halganka mideynta ummadda Soomaaliyeed, kaas oo ah, weligiina ahaa hadafka Soomaaliyaa.

## 9. Halgankii Leegada 1943-1956.

1921kii dadka Soomaaliyeed waxa ku dhacay waxay la murugoodaan. Taas oo ah daraawiishtii oo la jebiyey, Sayidkii oo u dhintay silic, gumeystayaashii oo ku sii adkeyey dadkii cadaadis iyo addoonsi, si ay u cidhibtiraan dabayaaqadii daraawiishta. Sidaa darteed dadka Soomaaliyeed waxaa ku dhacay kala firir, arrintaasi waxay taagneyd ilaa dagaalkii labaad ee dunida. Markii uu dagaalkii bilawday 1939kii waxaa ka dhashay dalka Soomaaliyeed dhaqdhaqaaq labaad. Dhallinyaro badan ayaa askartii gumeysiga qoratay, oo dhulal kale ku soo dagaalamay, waxayna ku soo noqdeen Soomaaliya iyaga oo ay badankood dhaawac yihiin, kuwo badana waxay ku soo dhinteen dagaalkii, dalka Soomaaliyeedna waxaa ku dagaalamay Ingiriiska iyo Talyaaniga, waxaana ka soo gaadhay dadka Soomaaliyeed hoog iyo rafaad, waxyaalahaas oo dhani waxay ku dhalisay dadka Soomaaliyeed isweydiin ah: Maxay dhallinyarada Soomaaliyeed u galeen dagaalka? Maxaase dhulkeenna loogu dgaalami? Maxaase dhulkeenna innagu

u maamulan weyney? Iyada oo ay isweydiintaasi ka taagan tahay Soomaaliya ayaa waxa xilkii hoggaaminta ummadda dusha ku qaaday dhallinyaro ka kooban 13 qof, kuwaas oo magaalada Xamar ku aasaasay 15kii Maajo 1943kii Ururkii Dhallinyarada Soomaaliyeed kaas oo noqday. Xisbigii Leegada. Ujeedada Xisbiga Leegadu waxay ahayd in loo halgamo mideynta iyo xoreynta Ummadda Soomaaliyeed, taasina waxay keentay in ay dadka Soomaaliyeed meelkastaba ha joogeene ku soo biiraan xisbiga leegada. Xisbiga Leegadu wuxuu awood u yeeshay in si deg-deg ah u aasay qabyaaladdii oo uu dadka Soomaaliyeed mideyey fikraddoodii, dadka Soomaaliyeed oo dhan meel kastaba ha joogeene waxay ku dhawaaqi jireen oraahyo isku mid ah, oo ay ka mid yihiin: «Soomaali isku mid ah». «Soomaaliya hannoolaato».

Guulaha uu gaaray xisbiga Leegadu waxaa ka mid ahayd in uu ogolaysiiyey gumeysiga in la siiyo koonfurta Soomaaliyaa gobannimo toban sanadood ka dib 1950-1960kii. Intaas ay leegadu ururinaysay dadka Soomaaliyeed, gumeystayaashuna waxay ku hayeen cadaadis, markiise ay ogaadeen in ayna ka gulaysaneynin, oo ay in ay faraha kala baxayaan koonfurta Soomaaliyeed, ayey bilaabeen sidii ay ugu yeelan lahaayeen leegada dad iyaga u adeega, iyaga oo ka faa'iideysanaya duldulleelka ay ka heleen dhismaha xisbiga leegada, wuxuuna gumeysigu ku guuleystay siyaasaddaas.

Maxaa yeelay markii la soo gaaray 1956kii maamulka leegada waxaa gacanta ku qabtay dad dibusocod ah, oo uu gumeysiga cusub khatalay waddadii toosneedna ka leexiyey oo isaga u noqday adeegayaal, taasina waxay keentay siyaasadii musuqmaasuqa ahayd ee lagu maamuli jirey Soomaaliya laga bilaabo 1956kii ilaa markii uu kacaanku dhashay. Laakiin haddii uu maamulkii leegadu xumayey markii dambe 1956 sababtu ma ahayn fikradda leegada oo xumaatay ee waxaa weeye dadkii gacanta ku dhigay leegada ayaa xumaaday oo noqday dibusocod.

## 10. Kacaankii 21kii Oktoobar iyo Mideynta dadka Soomaaliyeed

**«In loo halgamo mideynta Ummadda Soomaaliyeed»**

Hadalkaasi waxaa weeye qodob ka mid ah ujeedooyinkii Kacaankii 21kii ee lagu soo koobay warqaddii koowaad. Sidaas darteed xukummada Tawriga ahi iyada oo hoggaanminaysa dadweynaha Soomaaliyeed waxay dusha ku qaaday xilkii weynaa ee ku saabsanaa mideynta Ummadda Soomaaliyeed iyada oo ku socota siyaasad run ah oo ka duwan tii beenta ahayd ee ay ku socotay dawladdii musuq-maasuqa ahayd.

Siyaasadda uu ku socdo kacaanku waxay tahay in lagu doono dalalka maqan si alla sidii ay ku suuroobi karto in lagu helo, laakiin kacaanku isaga oo rumaysan mabaadi'da Ummadaha Midoobay iyo kan Midawga Afrika ee ah in lagu dhammeeyo dhibaato kasta si nabadgeliyo ah ayuu weyddiistay gumeycstayaasha in ay faraha kala baxaan dalalka Soomaaliyeed.

Kacaanku isaga oo ogsoon in ay xabashidu tahay cadawga kowaad ee Soomaaliyeed xogiisii ayuu isugu geeyey isaga oo ku socda siyaasadda soo socota:

1. Kacaanku wuxuu ku dadaalay in uu ka dhaadhiciyo dawladaha adduunka siiba kuwa Afrika in ayna Soomaalidu doonaynin dhul Xabashidu leedahay, iyo in ayna Soomaaliya iyo Xabashidu soohdin isku haysanin ee ay tahay waxay isku haystaan dhul ballaaran oo ay Soomaalidu leedahay, kacaanku guul weyn ayuu ka gaaray arrintaas.

2. Kacaanku wuxuu ku guuleystay in uu ka dhaadhiciyo dawladaha Afrika badankooda inay xabashidu ka mid tahay gumeystayaasha maxaa yeelay waxay ka qayb gashay shirkii Baarliin 1884-1885kii ee lagu qaybiyey Afrika.

Kacaanka Soomaaliyeed markii uu ku guuleystay arrimahaas aan soo sheegnay ayuu soo hor dhigay arrinta dalka Soomaaliyeed ee ay xabashidu haysato shirkii 10aad ee Midowga Afrika 1973kii, shirkaas oo markii ugu horreysey lagaga tallaabsaday qodobkii distorka Ururka Midowga Afrika ka midka ahaa ee oran jiray, in lagu dhaafo soohdimaha u dhexeeya dawladaha Afrika sidii uu gumeysigu kaga tegey.

Shirku markii la soo hor dhigay arrintaas xil ayuu iska saaray wuxuuna ku wareejiyey Guddii ka kooban siddeed dawladood, Guddidaasi markii ay baareysey arrintaas muddo

sannad ah ayey soo hor dhigtay wixii ay soo qabatay shirkii 11aad ee Midowga Afrika, laakiin shirkaasi waxba kama uusan qabanin hawshaas. Sababtuna waxay tahay xabashida oo ku adkaysatay in ayna dal ka haysanin Soomaaliya. Hase yeeshee, mar dambe ayaa Guddigii xil la saaray in ay sii wadaan baarista hawshaas muddo sano kale ah.

Haddaba haddii aan dib ugu fiirsano doonistsa dalalka maqan lagu doonayo si nabadgelyo ah waxaan arkeynaa in ay waxba ku suuroobi waayeen. Laakiin haddii ay suuroobi weyday in lagu helo dalalka maqan si nabadgeliyo ah, maxaa la yeeli? Sida runtu tahay Kacaanku markii uu ku doonayey dalalka maqan si nabadgeliyo ah, waxay ka ahayd ilaalinta nabadgeliyada adduunka, runtiina waxay tahay dadka doonaya inay midoobaan in ayna cidina is hor taagi karin. Dalka Soomaaliyeed wuxuu ka koban yahay inta u dhexeysa Raas-Caseyr ilaa Hawaas, Siyallow ilaa Qooriga-Tajoorra. Dalka intaas le'eg barkiisna wuu madaxbannaan yahay, barna waa la gumeystaa. Ummadda Soomaaliyeed iyadoo ogsoon xaqiiqadaas, garanaysana inay leedahay cadaw badan dlka gudihiisa iyo dibaddiisaba, waxay goosatay inay xoojiso difaaceeda si uu gaashaanka ugu dhigo cadawgaas. Tallaabooyinka ay dawladda kacaanka ahi ka qaaday siyaasadda difaaca iyadoo ka wakiil ah ummadda, waxaa ka mid ah:

1. In laga dhaadhacsiiyo dawladaha adduunka asaaska hawlaha dalalka Soomaaliyeed ee la gumeysto.
2. In la xoojiyo dhaqaalaha dalka.
3. In la kordhiyo waxbarashada dadka Soomaaliyeed.
4. In la xoojiyo xoogga difaaca waddaniga ah.
5. In la baro dadweynaha gaar ahaan kuwa aqoonta leh tabta dagaalka, (Xalane, Xarumaha dhallinyarada iwm.)
6. In lala socodsiiyo dadweynaha hawlaha dalalka maqan.

Tallaabooyinkaas iyo kuwa la mid ah waxaa loo qaadayaa sidii lagu diyaarin lahaa ciidan xoog leh oo lagu ilaaliyo nabadda, laguna daafaco danaha ummadda Soomaaliyeed.

Dadka Soomaaliyeed wuu gaari doona midnimadiisa mar ay noqotaba. Mana jiro wax ka joojin karaa dad xaqoodii raadsanaya.

## WEYDIIN

1) Haddii aad ka socotid Raascasiir ilaa Hawaas ama Siyallow ilaa Qooriga Tajoorra ma arkaysid wax is-khilaafsan. Maxaa ugu wacan?

2) Ka sheekee faa'iidada iyo dhibaatada ay u soo jiiday dadka Soomaaliyeed midnimadiisu?

3) In kasta uu dadka Soomaaliyeed firirsan yahay, hadana markii uu cadaw soo fara geliyo si dhakhsa ah ayuu isugu ururaan. Ka sheekee arrintaas?

4) Maxay isugu bahaysteen gumeystayaashu dalka Soomaaliyeed?

5) Sayid Maxamed Cabdulla Xasan wuxu ahaa geesi u soo halgamay mideynta Soomaaliyeed. Ka sheekee:
   b) Sida ay ahayd nolosha dadka Soomaaliyeed 1900kii?
   t) Waxbarashadii Sayidka.
   j) Fikradaha cusub ee uu la yimid Sayidku Soomaaliya.

6) Goormaa, xaggee baase lagu asaasay leegada?

7) Ka sheekee halgankii leegada?

8) Kacaankeenna barakaysani si dhab ah ayuu u doonayaa dalalka maqan. Si tifaftiran uga sheekee tallabooyinka uu qaaday?

9) Xumaanta qabyaaladda dhibaatada ay u soo jiiday dadka Soomaaliyeed.

Casharka 2aad

# DUULLAANKII GUMEYSIGA IYO DHAQDHAQAAQYADA GOBANNIMADOONKA

## 1. Duulaankii Gumeysiga.

Sahamiyeyaasha Yurub ee sahanka ku yimid Afrika, kolkii ay arkeen barwaaqada dhulka Afrika ayey ugu baaqeen waddamadooda in ay ka faa'iideystaan barwaaqadaas. Markaasay gumeystayaasha reer Yurub ku soo duuleen qaaradda Afrika, si ay warshadahooda uga helaan alaab ceeriin ah, si ay badeecaddooda ugu helaan suuq ballaaran.

Gumeystuhu wuxuu si bareer ah ku qaatay barwaaqadii

wuxuuna helay xoog hawlkar ah oo qiima jaban uu ku shaqayqaysto.

Gumeystuhu dembiga ugu weyn uu bani-aadamnimada ka galay wuxuu ahaa inuu dadka Afrikaanka ah ka dhigay badeeco la iibgeeyo oo faa'iido badan uu ka helo. Taariikhdu waxay inoo sheegeysaa in gumeystuhu malaayiin dad ah ka raray Afrika oo la geeyey Ameerika, si ay uga shaqeeyaan beeraha iyo warshadaha. Tirada dadkii ganacsiga bani-aadamka ku dhintay ama laga dhoofiyey Afrika waxa ay gaareysaa 100 malyan oo qof. Si ayaan dawladaha Yurub ee wax gumeysan jirey ugu diririn boobkii la kala boobaayey dhulka Afrika ayey waxay qabteen shirar badan oo ay isugu yimaadeen dawladahaas, shirarkaassoo lagu qaybsaday dalalka iyo dadka Afrika.

Gumeystuhu wuxuu dadkii Afrikaanka ugu shaqaysstay si naxariis la'aan ah, dhulka ay tabcanaynee iyo iyagaba isagaa lahaaday kuwa uu ka dareemo ineyaan addeeceyn, wuu cadaabi jirey, wuu dili jirey tuulooyinka ay deganaayeen wuu gubi jirey, carruurtooda wuu leyn jirey.

Wuxuu baaba' ka dhigay buulshada Afrikaanka oo dhan, baaruudda uu la yimid gumeysiga-taasoo aan reer Afrika hore u aqoon ayaa argagax weyn gelisay dadkii Afrika.

Boqolaal sano ayey Afrika ku nooleyd gumeysiga hoosti-

isa oo uu boobaayey, dulmi iyo dullina ku hayey. Cammirnaanta Yurub iyo horukaca dhaqaalaheeda waxaa qayb weyn ka qaatay barwaaqada Afrika iyo dhididka Afrikaanka.

Gumeysigu kuma ekeyn Afrika oo kaliya, wuxuu ku fidsanaa Aasiya, laatiin Ameerika, Dawladaha Yurub, Ingiriiska, Faransiiska, Beljinka, Burtuqiiska, Talyaaniga, Isbaanishka, Jarmalka, iyo kuwa kale, waxa ay ahaayeen kuwa qayb weyn ka qaatay duullaanka gumeystaha Yurub uu ku duullay dunida inteeda badan.

## 2. Dhaqdhaqaaqa Gobannima doonka.

Ummadaha uu Gumeysigu kadeedey kama ayaan raalli noqon shisheeyaha cadaabayey, barwaaqadoodana boobayey, iyagana ku shaqaysanayey. Kolkii dadkii garashadooda Siyaasiga ahi korodhay dagaalkii labaad ee dunida ka dib waxay bilaabeen inay ku fekeraan gobanimo. Gumeysigiina wuxuu dhakhsaba ku dhaqaaqay sidii uu uga hortegi lahaa dadka fakradahaas wata, si uu u aamusiyo dhawaaqa ummadaha ugu baaqayey inay ka dhiidhiyaan gumeysiga, si uu isu hortaago kacaanka ka iman kara caradii ku biirtay Ummadaha ee ka dhalatay godobtii u gumeystuhu ka galay.

Hase yeeshe uma ayan ahaan sidii uu doonayey gumeystuhu. Dadkii dhakhso ayey u barbaarugeen, una garteen ulajeedooyinka waaweyn ee loogu baaqayey. Waxaa durbadiiba unkamay dhaqdhaqaayo gobannimo doon ah oo ka dhashay waddan kasta uu gumeysigu gacanta ku hayey ha ku yaal Afrika, Asiya, ama laatiin Ameerika.

Dhaqdhaqaayadaas waxay gumeystaha ku qaadeen dagaal kulul oo ka wareeriyey, iyo halgan kharaar oo kama dambeyn ah, halqabsigooduna wuxuu ahaa «ama geeri ama nolol». Gumeysigii wuxuu isku dayey isagoo hubkiisuna aad uga horeeyey kan ay ku dagaalamaan waddaniyiintu inuu dadkii ka dhigo dukun daakun; hase yeeshe geesiyaashii kama ayan baqan gumeysiga iyo hubkiisii cuslaa ee waxay sii wadeen halgankii, dhiigoodii qaaliga ahaana ku waraabiyaan geedkii xorriyada. Kumaayaal geesiyaal ah ayaa naftoodii qiimahalahayd ku waayey dagaaladii gobanimo doonka ahaa. Geesiyaashaas waxay maanta muteen in la xusuusto oo la xuso.

Dhaqdhaqaayadii gobanimo doonka ahaa halgankii ay la galeen gumeysiga, waxay ka gaareen guul weyn, gobanimada aynu maanta haysanno iyagaa inoo soo hooyiyay.

Marka aan soo qaadno Afrika waxaan xusuusanaynaa in ay waqti waqtiyada ka mid ah dhammaanteed noqotay goobo dagaal oo ay isku haleelaan waddaniyiinta iyo gumeystayaasha, halgankaas ay Afrika soo gashay, wuxuu ahaa marka taariikhda dib loo ego mid qaaradda oo dhan walaaleeyey, danahoodana aad isugu xiray.

Sidaas oo kale ayaa waddamada la gumeysan jirey ee dunida ku nooli u galeen halgan geesinimo ah, oo ay ku raadinayaan gobannimo.

Waddankeennu wuxuu ka mid ahaa dalalka gumeysigu aad isugu dayey inuu baabiyo. Qaybintii la qaybsaday dhulkeenna weli dhibaatadiisii way ina haysataa. Dhibaatooyinka gumeysigu inoo keenay inkasta oo uu isagu uga jeeday ummadnimada Soomaaliyeed inuu ciribtiro, waxay dhaliyeen in ay ummaddi isku duubanto, dagaalna kala hortagto gumeysiga iyo ciimaddadiisaba.

Halgankii gobannimodoonka ahaa iyo dagaalladii laxaadka lahaa ee ay hoggaaminayeen geesiyaashii waaweynaa oo uu ka mid ahaa Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, waxay ahaayeen kuwa ka soo dhashay dhibtii uu gumeysigu dadkaku hayey. Waxay ahaayeen baraarug iyo danqasho ay ummadda Soomaaliyeed ka danqatay gumeysiga. Inkastoo halgannadaasi guul gaarin, haddana dabkoodi ma ahayn mid bakhtiyay. Dhimbilihii ka haray baa soo ololay dagaalkii labaad ee dunida ka dib, kolkii uu soo baxay xisbigii siyaasiga ahaa oo la oran jirey, Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed «Leega» oo ummadda ugu baaqay midnimo, gobannimo, wuxu ahaa halgan cusub oo bilaabmay oo loo wada dhan yahay, oo dhiig fara badan ku qubtay, guushii waxaa yeeshay ummadda Soomaaliyeed oo laba waaxood gobannimo u soo hoyisey. Dhaqdhadhaqaaqyada gobannimadoonka meel kastaba ay joogaan waxa ay gaareen gobannimo wax yaar mooyaane.

Calammadii gumeystayaasha ayaa isdabajoog u dhacay, waxaa khasab ku noqotay inay oggolaadaan ummaduhu waxa ay doonayeen. Sidaasaana guumeysigu ha ahaado kii hore iyo kan cusubiba u jabay, oo uu har cad ka guurey waddamadii uu xaq darrada ku haystay guushiina ay raacday ummadaha xaqa ku dagaalmayey.

## WEYDIIN

1) Sidee gumeysigu ku yimid qaaradda Afrika? Maxaase ku kalifay inuu gumeysto?

2) Muxuu ku sameeyey gumeysiga dadkii iyo tacabkii? Muxuuse malaayiin dad ah uga raray Afrika?

3) Sheeg dawladaha Yurub oo duullaanka gumeysga qayb weyn ka qaatay?

4) Ummadihii la gumeysan jirey, maxay billaabeen kolkii garashadooda siyaasiga ahi korodhay? Muxuuse gumeysigu ku dhaqaaqay?

5) Wax garadka Afrika maxay ugu baaqeen ummadahoodii?

6) Muxuu gumeystuhu kala kulmay dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka?

7) Sidee gumeysiga waddankeenna u galay?

8) Kolkii kasmada siyaasiga ee ummadda Soomaaliyeed korodhay halgankoodii sidee buu isu beddelay?

9) Ilaa maanta guul buuxda kama aanan gaarin gumeystayaasha faallo gaaban arrintaas ka bixi.

Casharka 3aad

## MIDABTAKOORKA

### 1. Muxuu yahay Midabtakoorka?

Midabtakoorku waxaa weeye mabda'a lagu kala sooco dadka midabkooda, waxaana keenay Afrika gumeysiga reer galbeed, Dawladda Koonfurta Afrika iyo fallaagada Roodhiisiya ayaa midabtakoorka ka dhaxlay gumeysigii, waxayna ugu dhaqmaan si rasmi ah.

Midabtakoorka Koonfurta Afrika wuxuu salka ku hayaa Qawaaniinta kala geddisan iyo distoorkeeda, kuwaas oo cuskanaaya aragtida oranaysa in ay dadka caddaanka ahi ka sarreeyaan dadka madow, iyo in dadka madow loo abuuray in ay u shaqeeyaan dadka cad. Dadka rumaysan mabda'a sarreeynta caddaanka waxay u qaateen mbda'aas sababaha soo socda:

### 2. Sababaha Guud.

Waxaa jira dad cad oo rumaysan in ay ka sareeyaan dadka kale siiba dadka madow.

Nasiib xumida aadamiga waxaa ka mid ahaa in dadka sidaas rumaysan ay ku jireen culumo diinta masiixiga iyo culimo kale, iyo dad siyaasiyiin ah, waxayna u taageerayeen aragtidaas labada qodob ee soo socda awgood:

1. Dadka mabda'an rumeysani, waxay ku doodaan in ay yiraahdiin xadaaradda iyo horumarka culuunta kala geddisan ee uu aadamigu gaaray xag kastaba, waxaa dhaliyey dadka cad, dadka madowna ka ma ayna qayb gelin, taasina waxay tusaale u tahay in ay dadka caddaanka ahi fikiraan, kuwa madowna ayna fikirin, sidaas darteed dadka caddaanka ahi way ka sarreeyaan dadka madow. Hadaba si aan u ogaano heerka ay ka gaareen akhlaaq darrida dadka rumaysan mabda'a sarreeynta caddaanka, waa in aan u soo qaadano tusaale ahaan oraahyo ay ku hadleen dad siyaasiyiin ah oo ka mid ahaa dadka rumeysan mabda'aas.

Waxaa ka mid ahaa Hitler oo isna la yimid aragtida sar-

reeynta caddaanka, wuxuuna yiri:

«Waxaa dambi weyn ah oo ka soo horjeeda caqliga, isla markaasna ah waali fool xun, in aan isku dayno inaan barno qawaaniinta kuwa daayeerrada oo kale ah». Waxaa kale oo ka mid ahaa kuwaas Siyaasiyiinta ah, nin ka mid ahaa golaha Wasaaradda Dawladda Koonfurta Afrika 1953dii wuxuuna yiri: «Siyaasaddeennu waxay ku dhisan tahay in ay awoodda adduunku ku koobnaato gacanta dadka cad.»

2. Qodobka kale ee ay u cuskanayaan dadka rumaysan midabtakoorka, waxaa weeye war laga helay diinta Yuhuudda, kaas oo oranaya: «Nebi Nuux ayaa isaga oo hurda maradii dabeel ka qaaday, waxaana arkay isaga oo qaawan wiilkiisii Xaam, kuma uusan duwin Aabbihii maradii ee intuu orday ayuu u sheegay walaalihiis Saam iyo Yaafis, labadaas oo ka edeb badnaa Xaam ayaa intay soo ordeen Aabbahood maradii ku duway.

Nebi Nuux naxariistii Ilaahay dushiisa ha ahaatee, markii uu baraarugay oo uu ogaaday wixii dhacay ayuu ku habaaray Xaam iyo tarankiisuba inay weligood addoon u ahaadaan Saam, iyo Yaafis tarankooda, sidaas darteed, bay dadka madow ee ka tarmay Xaam uga hooseeyaan dadka cad ee ka tarmay Saam iyo Yaafis. Sheekadani waxa ay ka mid tahay sheekooyinka ay Yuhuuddu ku dareen diintooda, gumeysiguna wuxuu ka dhigtay xaqiiqad uu cuskado, kuna fushado danahiisa, dadkana uu ku xado.

### 3. Salla'aanta Midabtakoorka.

Mabadii'da aan soo sheegnay ee ay cuskanayaan dadka ku dhaqma siyaasadda midabtakoorka ma ay jirto wax alla wax cilmi ah oo ay salka ku hayaan, waxa keliya oo ay ku dhisan yihiin waxaa weeye khuraafaad, dadka rumaysanna laguma tilmaami karo dad miyir qab ah, maxaa yeelay waxay iska indhatirayaan xaqaa'iqada taariikhda, diinaha ilaahay iyo cilmiga cusub.

Halkan waxaan ku caddeynaynaa bennimada iyo salla'aanta mabda'a midabtakoorka, innaga oo u cuskanayna diinta

Islaamka, cilmiga cusub iyo xadaaradda «Ilbaxnimada» uu aadamigu soo maray.

### 4. Diinta Islaamka.

Diinta Islaamku waxay caddaynaysa, inuu banni'aadamku siman yahay oo ayna marna laba qof ku kala sarray karin dhalasho ama midab. Waxa keliya ee uu qofku kaga fiicnaan karo qofka kale waa haddii uu ka badsado rumaynta Ilaahay, shaqada wanaagsan iyo aqoon, sidaasna waxaa inoo sheegay Quraanka. Axaadiista rasuulkeenna iyo sidii uu Nebigeennu naxariistii Ilaahay korkiisa ha ahaatee ula dhaqmi jiray dadka.

### 5. Cilmiga Cusub.

Hubaalaha uu gaaray cilmiga cusubi waxay sugaysaa in uu dadku iskaga mid yahay wixii ka hooseeya dubkooda, taas macnaheedu waxaa weeye, in kasta oo ay dadku ku kala duwan yihiin midabkooda, hadana inay iskaga mid yihiin xagga caqliga iyo fikirkaba, waxaa keliya ee ay laba qof isku dhaafi karaan waxaa weeye hadba sida ay labadooda bulsho ugu kala horreeyaan cilmiga iyo waxtarka. Arrintaas waxaa lagu sugay meelo lagu baarayey cilmiga oo la isugu soo ururriyey carruur midab kastaba leh, oo wax lagu barayey, waxaana la ogaaday in ayna waxba ku kala duwanayn, xagga waxbarashada, caqliga, fikradda, iwm.

### 6. Xadaaradda Aadamigu soo maray.

Salla'aanta mabda'a midabtakoorku waxay aad inoogu caddaanaysaa marka aan dib u raacno xadaaradihii u aadamigu soo maray maxaa yeelay xadaaradihii ugu waaweynaa uguna horreyey taariikhda aadamiga waxay ku dhasheen kumanyaal sannadood ka hor dhulka Afrika «Masar iyo Bont» iyo Aasiya «Ciraaq, Iiraan, Yaman iyo shiina» ee kuma ayna dhalan Yurub.

Dadkii dhaliyeyna waxay ahaayeen dad madow «Masar, Bont» ama casaan «Ciraaq». Marka kale haddii aan u fiirsano horumarka xag kastaba lahaa ee ay ku dhisnaayeen xadaradahaasi, waxaan ogaanayna inay dadka hadow kaga horreeyeen kumanyaal sannadood dadka cad xagga waxyaalaha soo socda:

1) Degista Togaga iyo webiyaasha.

2) Garashada qodashada dhulka, xoolaha oo lagu qoto dhulka, biyo xerreeno iyo keliyo laga jeexdo waadiyada, arrimahaas oo horay u mariyey nidaamka beerashada.

3) Dhismaha dhalashada dawlad ku maamusha dalkeeda iyo dadkeedaba qawaaniin.

4) Dhismaha magaalooyinka.

5) Qoraalka Afafka.

6) Xiriir Ganacsi oo dhex mara dawladaha.

7) Falsafadda iyo murtida.

8) Ku raaxeysiga suugaanta iyo musikada.

Markii dadka madow ee Afrika ku noolaayeen noloshaas iftiinka ah ee salka ku haysay dawlad nimada iyo xadaaradahaas horumarka leh xag-kastaba, caddaanka reer Yurub waxay Deganaayeen godod, noloshooduna waxay ku dhisnayd xoolonimo, ugaarasho, jahlinimo iyo mugdi. Waxaa kale oo inoo sugaya salla'aanta midabtakoorka runta cilmiga ku dhisan ee ah inuusan cilmiga ummad u gaar ahayn, oo ay ummaddaha adduunka oo dhan wada waddaagaan. Dhismaha cilmiga ummad kastana waxay ku kordhisaa aqoonteeda.

Sidaas darteed ma ay jiri karto ummad gaar u sheegan karta cilmiga, hadaba, haddii dadka reer Yurub ku doodayaan inay dadka kale kaga sarreeyaan horumarkii ay gaareen dhowrkii Qarniyaal ee tegey, waxaa isweydiin leh ma meel bannaan ayey ka dhaliyeen horumarkoodaas ? Jawaabtu waxay tahay, maya. Waxa ay ku doodayaana waa been aan raad lahayn, maxaa yeelay sida runta ah ee la ogsoon yahay, ma ay jirto xadaarad ka dhalata meel banaan, ee xadaarad kassta waxay cuskataa kuwii ka horreeyey sidaas ayey xadaaradda reer Yurub u cuskanaysaa kuwii ka horreeyey siiba xadaaradii islaamka ee uga tallawday dalka Asbaaniya, waxyaalahaas aan soo sheegnay ee

cilmiga ku dhisan ayaa inoo caddeynaya beennimada iyo salla'aanta mabda' midabtakoorka, dadka rumeysanna waxaa ka indho tiraya xaqaa'iqdaas Kibir iyo isla weyni.

## 7. Sababaha Gaarka ah ee Midabtakoorka.

Horay baan u soo sheegnay sababaha guud ee ay cuskanayaan dadka rumeysan midabtakoorka, laakiin caddaanka koonfurta Afrika iyo kan Roodeesiya, iyaga oo rumeysan sabaha guud ee aan soo sheegnay, hadana waxaa iyaga u gaar ah labada qodob ee soo socota:

## 8. Sababata dhaqaalaha.

Dhaqaaluhu wuxuu ka mid yahay waxyaalaha u geeyey caddaanka koonfurta Afrika iyo kan Roodeesiya inay ku dhaqmaan midabtakoorka.

Maxaa yeelay, waxay qabaan hunguri weynaan iyo Iimaan darro, waxayna doonayaan inay kaliggood yeeshaan wax alla wixii hanti ah ee laga soo saaro dalka, waxa kaliya ay ugu suurocbi kartaa arrintaasina waa inay sii xoojiyaan siyaasaddii midabtakoorka ahayd ee ay ka dhaxleen gumeysigii Ingiriiska, oo ayna marna u ogolaanin dadka madow inay wax ku yeeshaan waxa dalka laga soo saaro, si ay u hirgeliyaan siyaasaddaasna, waxay ku dadaalaan in uu dadka madow ku noolaado cudur iyo jahli maxaa yeelay waxay ogsoon yihiin caddaanku in uusan qof aan caafimaad qabin oo aan aqoon lahayn marna dhaqaalihiisa kor u soo **qaadi karin.**

## 9. Sababta nafsiga ah.

Caddaanka koonfurta Afrika iyo kan Roodeesiyaba tiradooda aad ayey uga yar tahay tan dadka madow, yari daas ay yar yihiin iyo iyaga oo gosoon in ayna u dhalanin waddanka ee ay ku yimaadeen **Duullimaad** waxay ku abuurtay nafsaddooda inay la colloobaan nidaamka dimuqraadiga ah, maxaa yeelay, waxay ogsoon yihiin haddii lagu maamulo dalka dimuqraadinnimo oo uu qof kasta lahaado cod markii la soo dooran Baarlamaanka, in uu maamulka dalku ka wareegi gacanta inta yar ee cad, oo uu u wareegi inta badan ee madow, sidaas darteed cab-

si ay ka cabsi qabaan mustaqbalka dadka cad ee yar ayey ugu dhaqdaan mabda'a midabtakorka.

## 10. Hirgelinta Mabda'a Midabtakoorka.

Dawladda Koonfurta Afrika iyada oo cuskanaysa Qawaaniinteeda iyo distoorkeeda oo ku dhisan mabda'a sarreeynta caddaanka, waxay si fool xun u hirgelisaa siyaasadda midabtakoorka, iyada oo ka tillaabsanaysa qawaaniinta dawliga ah, madabtakoorka, iyada oo ka tillaabsanaysa qawaaniinta dawliga ah, mabadiida ummaadaha Midoobay, iyo xuquuqda aadamiga, waxayna u qaybisay dadka degan koonfurta Afrika si ay u dhaqan geliso midabtakoorka qaybaha soo socda:

1. Dadka degan koonfurta Afrika tiradoodu waxay tahay 24 Malyuun, afar malyan oo qur ah ayaa caddaan ah, waxaa la yaab leh in ay dadka cad ee tiradoodu sidaas u yar tahay xaq isu siiyeen kaligood inay u maamulaan waddanka sida ay iyagu doonayaan, 20 malyan ee madowga ahina ma ay jirta wax alla wax ay ku leeyihiin maamulka iyo barwaaqada dalka, sida ay sugayso siyaasadda midabtakoorka. Siyaasadda midab takoorka ku dhisani waxay keentay, in ay caddaanku kaligood xaq isu siiyeen inay ka qayb galaan dhismaha dawladda, in qofka caddi keligii xaq u leeyahay in la doorto, ama uu isagu bixiyo codkiisa markay doorasho jirto, waxaa kale oo ka mid ah waxyaalaha ay caddaanku xaq keligood isu siiyeen:

1. Warbarashada.
2. Daawada.
3. Shaqada.
4. Degista magaallooyinka.
5. Maamulka dhaqaalaha.
6. Ciidanka difaaca iyo kan nabadgelyada.
7. Waxay isa siiyeen caddaanka Koonfurta Afrika 85% dhulka oo ah meelaha ugu fiican, xagga beeraha iyo macdanta.

Hadal iyo dhammaantii caddaankaas yar ee uu Ingiriisku keenay dalka koonfurta Afrika, iyaga oo ku socda hunguri weynaan, imaandarro, bahalnimo, iskana indha tiraya xuquuqda aadamiga, waxay keligood iska qaateen wax alla wixii barwaa-

qo dalku lahaa. Taasina waxay gaarsiisay inay ku nool yihiin maanta nolol aad u sarreeysa xag kastaba.

## 11. Dadka Madow.

Dadka madow ee koonfurta Afrika tiradoodu waxay wax yar ka yar tahay 20 malayn. Dadka sidaas u badan, ahna kuwii u dhsashay waddanka, ma ay jirto wax alla wax xaq ah ay ku leeyihiin maamulka iyo khayraadka dalka. Sida uu sugayo mabda'a midabtakoorku dadka madoobi awood kuma laha, xagga dhismaha dawladda, siyaasadda, dhaqaalaha, waxbarashada, degmada magaalooyinka, caafimaadka iyo waxyaalaha kale. Waxaa laysugu soo ururiyey meelaha ugu faqiirsan dhulka, taasoo ah 13%, inkasta oo lagu magacaabay intaas yar dhulkii dadka madow hadana waxaa maamula xagga siyaasadda iyo dhaqaalahaba dawladda cadaanka ah, waxayna ku maamushaa si ayna marna madowgu horay ugu marin, waxa kale oo jira haddii uu qof cad ama dawladduba u baahdaan meel ka mid ah dhulka dadka madow, si dhib yar ayaa looga cayriyaa qofka madow, waxaa kale oo ka mid ah, cadaadiska naxariis darridda ah ee lagu hayo dadka madow waxyaalaha soo socda:

1. Markii qofka madow lagu xukumo dil, ama xarig, looma cuskado sharci, si aan u ogaano arrintaasna bal aan u fiissano tirakoobta soo socota ee lagu soo saaray Koonfurta Afrika sannadkii 1968-69:

   b) Waxaa xarig lagu xukumay 500.000 qof oo madow ah.
   t ) Maalin caadi ah aynan rabshadi jirin, waxaa ku xirnaa jeelalka 88,000 qof oo madow ah.
   j ) Waxaa jeelalka ku dhintay 340 qof oo madow ah.
   x) Waxaa jeelalka lagu dilay 84 qof.
   kh) Waxaa lagu dhuftay dadka xirnaa 25,933 jeedal.
   d) Waxaa ku dhashay jeelalka 187 ilmo.

2. Madowga looma oggola waxbarashada.
3. Dadka madow dirqi ayaa lagaga shaqaysiiyaa, mushqaayadna way qaataan, mana ay laha fasax, iyo caymis.

4. Dacdarridda ay ku nool yihiin shaqaalaha madow waxay u keentay in cudurada xunxun si aad ah ugu faafaan.

5. Qof waliba meesha uu ka shaqeeyo kama tagi karo fasax la'aan, loomana oggolaado sida badan, taasina waxay keentay in Aabbihii, hooyadii iyo carruurtii weligood is arkin.

6. Markii uu qof madow cusbitaalka galo dawo lama siiyo, waxaa laga dhigtaa waxbarasho. Tusaalle ahaan: markii ay dhakhatiirtu doonayaan inay tijaabiyaan wadno banni-aadam beeristiisa, waxay tijaabo ka dhigtaan dadka madow.

Nolosha caynkaas ahi waxay gaarsiisay dadka madow inay ku noolaadaan nolosha ugu hooseysa adduunka. Bal hadda si aan u ogaano sida ay u saameeysay siyaasadda midabtakoorku dadka Koonfurta Afrika caddaan iyo madowba aan u fiirsanno waxyaalaha soo socda:

1. 1938 dadka cad waxay lahaayeen keligood waxa laga soo saaro dhulka 80%.

2. 1941-1942 dhexdhexaadka waxa uu helo qofka cad sannadkiiba waxay ahayd 600 Doolar, qofka madowna 40 Doolar.

3. 455kii qof ee caddaan ah waxay leeyihiin hal dhakhtar, dadka madow oo idilna waxay leeyihiin 120 dhakhtar.

4. 1967 dhexdhexaadka geeridda carruurtu waxay ahayd: kunkii llmood ee caddaan ah ee ka dhasha nolol, waxaa ka dhiman jirey 24 ilmood.

   t) Kunkii ilmood ee madow ah ee nolol ku dhashana, waxaa ka dhiman jirey 200-250 ilmood.

5. Celceliska cimriga dadka cad waxaa weeye 64 sannadood, dadka madowna waxaa weeye 40-46 sannadood.

## 12. Heerka Ururka Ummadaha Midoobey ka taagan yahay Midabtakoorka.

Ballan qaadka ummadaha Midoobay, maadadiisa koowaad, waxay caddaynaysaa, in la xoojiyo xurmaynta xuquuqda iyo xurriyada dadyowga adduunka oo dhan, iyaga oo aan lagu kala soocin dhalashadooda, afkooda iyo diintooda. 1848kiina guddida guud ee Ummadaha Midoobay waxay soo saartay baaqii caalamiga ahaa, ee ku saabsanaa xuquuqda aadamiga, kaasoo ay caddeynayso madadiisa 1aad iyo tan 2aad «In dadka oo dhani ay dhashaan iyaga oo xor ah una siman yihiin karaamada iyo xuquuqda.»

Ummadaha Midoobay iyada oo tix raacaysa ballan qaadkeeda iyo baaqi xuquuqda aadamiga waxay ku dadaashay, tallaabooyin badanna ka qaaday, dawladaha adduunkana ku guubaabisay, sidii loo ciribtiri lahaa mabda'a foosha xun ee ah midabtakoorka, tallaabooyinka ay ka qaadayna waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

1. 1950 guddida guud waxay go'aan ku qaadatay, in laga dhigo 10ka bisha Diisambar sannadkii walba dhaaartii loo dabaaldegayey xuquuqda aadamiga.
2. Diisambar 1965 guddiga guud waxay sugtay ballan qaad dawli ah oo lagu ciribtirayo midabtakoorka, waxayna dhalisay guddi ka kooban 18 qof, oo tixraaca sidii loo fulin lahaa ballan qaadkaas, kaasoo dhaqan galay 1969kii.
3. Guddiga guud go'aan ayey ku qaadatay, in lagu magacaabay sannadk ii1971 sannadkii ciribtirista midabtakoorka, sidaas darteed waxay weydiisatay dawladaha adduunka in ay xusuusiyaan dadyowgooda xumaatada uu leeyahay midabtakoorka.
4. Ummadaha Midoobay marar badan waxay ku guubaabiyeen dawladaha adduunka in la cunaqabateeyo dawladaha ku dhaqda midabtakoorka.

Qodobadaa aan soo sheegnay waxay ka mid yihiin, tallaabooyin fara badan oo ay qaaday ummadaha midoobay sidii loo ciribtiri lahaa midabtakoorka tan iyo waagii la asaasay 1945

ilaa maantadan, haddana kuma ayna guuleysanin, sababtuna waxaa weeye awood darrida ka haysata ummadaha midoobay ballan qaadkeeda iyo taageerada buuxda ee ay siiyaan dawladda Mareykanka iyo Yurub galbeed dawladda koonfurta Afrika iyo Roodiisiya.

## 13. Heerka uu ka Taagan yahay Midowga Afriga Midabtakoorka

Midowga Afrika laga soo billaabo waagii la aasaasay 1963kii ilaa maantadan, waxay ku dadaaleysay sidii loo burburin lahaa mabda'a midabtakoorka, waxayna ka qaaday tallabooyin fara badan oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

1. Waxay ku guuleysatay in ayna dawladaha Afrika aqoonsanin oo ayan xiriir la yeelanin xag kastaba dawladda koonfurta Afrika iyo Roodiisiya.

2. Waxay guul ku gaartay in lagu cambaareeyo mabda'a midabtakoorka shirarka dawliga ah oo dhan.

   Waxaa kale oo ay guul ku gaartay in aan loo oggolaanin ergada koonfurta afrika inay ka qayb gasho shirarka ummadaha midoobay.

   Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyadoo ka mid ah ummadaha midoobay iyo Ururka midawga Afrika qayb weyn ayey ka qaadatay ciribtirka midabtakoorka.

## WEYDIIN

1) Waa maxay midabtakoorku?

2) Yaa keenay Afrika midabtakoorka? Muxuuse u keenay?

3) Muxuu cuskanayaa mabda'a sarreynta caddaanka?

4) Sheeg raad la'aanta mabda'a sarreynta caddaanka, adigoo u cuskanaya diinta islaamka iyo cilmiga cusub?

5) Sidee baad ku caddeyn kartaa in uu dadka madow kaga hooseeyey ilbaxnimada dadka cad?

6) Faallee nolosha dadka madow ee koonfurta Afrika?

7) Yaa taageera mabda'a midabtakoorka? Yaase ka soo horjeeda?

8) Wax ka sheeg sidii uu ururka midowga Afrika ula dagaallamay dawladaha midabtakoorka ku dhaqma?

Casharka 4aad

# QABYAALADDA

## 1. Dibudhaca ay keento:

Qabyaalladdu waa nidaam duug ah lagana ilbaxay, haatanna dunida aad ugu jiritaan yar. Waxa taariikhdu ka marag tahay in ummad kasta oo ka gilgilata nidaamkaa ay liibaanto, horumarkeeduna maalintaa bilaabmo.

Waxa jirtey in Soomaalidu dhawr sanno ka hor ay ku dhaqmi jirtey nidaamka qabyaalladda. Dalka waxa loo degi jirey reero aan is oggolayn, isuna col ah had iyo jeer. Reerku wuxuu ahaa koox magac guud ku wada abtirsata wuxuuna u qaybsanaa jilibyo iyaguna aan is oggolayn. Jilibka laftiisuna wuxu u qaybsanaa baho iyaguna xintama. Nidaamka qabyaaladdu waa ka caynkaas ahaa ee asalkiisuba ku dhisnaa kala tagga iyo kala qaybsanaanta bulshada Soomaaliyeed.

Intii aan Somoaalidu dawlad noqon, dadku wuxuu u badnaa xoola raacato iyo beeraley. Bulshadu waxay ku dhaqnayd qabyaalad, sharciguna wuxuu ahaa xeer qabiilo. Waxaa dhici jirtey in sida loo kala xoog badan yahay la isu muquunin jirey, xoolahana loo kala qaadi jirey. Waxa jirtey in dilka iyo dhacu badnaa oo nabadgelyada iyo xassilloonaantu aad u yaraayeen. Qabyaaladdu waxay ahayd halka gumaysigu inooga soo dhacay ee ku qabsaday dalkeena iyo ummadeena. Sababta oo ah inay u hirgelisey siyaasaddiisii caanka ahayd ee «Qaybi oo xukun». Hase yeeshee, waxa ka dambeeyey gobanimadii oo aynu gacantiisa ka maroorsanay. Ummad waliba waxay ku caymataa in yar oo ka mid ah oo aayaheeda wacan jecel naftoodana u hura. Soomaalidu runtii waqtiyadii gobanimo doonka waa illaaween qabyaaladda oo meel keli ah ayay gumaysigii uga soo wada jeesatay. Sidaana waxa ku rumowdey in guushu dhalato marka wadajir loo yahay. Markii aanu qaadanay gobanimo ee magaalooyinkii aad loo soo degey, nasiib xumo, qabyaalladdii ma tegin. Dadkii way ka jabtay xamaasaddii gobanima doonku, qabyaalladdii baa madaxa la soo kacday oo beesha ku baahday. Kaalinteedii ugu weyneyd, uguna foosha xumayd waxay ciyaartay markii dawladihii kacaanka ka horreeyey jireen. Daw-

ladnimo iyo qabiilinimo waxay noqdeen laba isu daran, khasaaradii weyneyd ee inagu dhacday kacaanka ka horna taas ayaa u sabab ahayd. Haddanna waxa bulshada Soomaaliyeed garwaaqsan tahay oo waaya arag u tahay in aan ummadnimo iyo qabyaaladi is raaci karin. Sababta oo ah, qabyaaladdu waxay lid ku tahay dhammaan fekradaha bulsho horusocod ahi ku dhaqanto.

## 2. Xumaanta Qabyaalladu leedahay:

Xagga nabadgelyada iyo xasiiloonaanta waxa jirta, in aanu qofka qabiiliga ahi daryeelayn oo had iyo jeer u taaganyahay colaad iyo xintan. Waxaa qofkaa u faan iyo ammaan ah, intaas oo qof buu diley, intaas oo jeer buu xoolo soo dhacay iyo wax la mid ah. Sideedaba qabyaalladdu waxay jideysaa in sida loo kala tamar badan yahay loo kala sarreeyo, laysuna gumeysto. Dawladnimada iyo caddaalladda xaggeeda, qabyaalladu waxyeello mooyee faa'iido uma laha. Sababta oo ah qofka qabiiliga ahi waa eex badan yahay, mana qabo in sharciga iyo xukunka dawladeed loo wada siman yahay. Waxa hartay halka ugu mudan ee ummadi ka dhismi karto, waa xagga dhaqaalaha. Horumarka dhaqaalaha waxa la gaaraa marka bulshadu u wada heegan tahay, ee qof waliba dhinaciisa ka tiirinayo. Marka dadku wax wada qabsanayo, ee qofku in kasta oo uu ku biirshaba ka fekerayo aayaha guud, ayuu dhaqaalahu koraa. Haddaba, waxa jirta in qofka qabiiliga ahi taa ka kasma gaaban yahay. Qofka qabiiliga ahi waa bartii-yaqaan, beeshana waxba kuma soo kordhiyo, ee waa keligii cune. Guud ahaan qabyaalladdu horumarka ummaddeena ma daryeelin marna, mana daryeeleyso. Run ahaan, dib u dhac weyn bay inoo geysatey. Gumaystayaashiina aad bay ugaga faa'iideysteen Soomaali baabi'inteeda iyo hoos u celinteeda.

## 3. Qabyaalad La'aanta:

Maanta sida aan ognahay bulshadu aad bay uga caafimaad qabtaa qabyaaladda. Taana waxa lib iyo mahad weynba ku yeeshay Kacaankii 21 Oktoobar. Kacaanku dagaal lixaad leh ayuu ku qaaday qabyaaladda. Waxaa jirtey oo aan fogeyn maalintii Soomaalidu, meel kasta ha joogtee, ku dhawaaqday in qabyaalad waxa la yiraahdo la aaso. Maalintaa ka dib waxa

dhashay wax-wada-qabsi iyo iskaashi, walaaltinimo, nabad iyo cadawga oo meel looga soo wada jeestay. Tallaabooyinka dhaadheer ee dhaqaalaheenu qaaday tan iyo kacaankii 21 Oktoobar waxa u sabab ah qabyaalad la'aanta.

Awel waxaa jirtey in qabiilinimadu ahayd wax qofka lagu ammaano, haddase waxay noqotay cay xun oo aan qofka qaadan karin. Taana waxaa keentay heerka wanaagsan ee bulshadu ka gaartay aqoon kororsiga iyo waxbarashada. Haddii aan u fiirsano ardayda dugsiyada waxa inooga muuqanaya intooda badan afkaar wanaagsan oo ku liddi ah qabyaaladda. Ardayga wanaagsani wuxu aamminsan yahay mabda'a hawl iyo hantiwadaag. Wuxu ku dhaataa Soomaalinimo, dadkiisa iyo dalkisana waa jecel yahay. Habeen walba wuxuu ku seexdaa oo himiladiisu tahay sida uu wax ugu kordhin lahaa bulshada, una daryeeli lahaa dalka.

Intii qabyaaladdu soo tiil dalkeena waxa jirey marba dad waxgarad ahaa oo ka soo horjeeday qabyaaladda. Waxay ahaayeen dad mar walba uga digi jirey, ama ka waanin jirey, ama isku dayi jirey in ay ku baraarujiyaan bulshada xumaanta iyo waxyeellada ay u leedahay qabyaaladdu. Dadkaa haddii aad taariikhdooda raad raacdo waxad helaysaa, in ay ahaayeen dad waddaniyiin ah oo samaanta iyo ummadnimada Soomaalida jecel. Haddaba, waxaa jirta in qabyaalladii dalka ku sii riiq leedahay oo aan ay weli ciribtirmin. Qof kasta oo hantiwadaagga iyo Soomaalinamada ku dhaataana waxa la gudboon oo xil ka saaran yahay sii baabi'inta qabyaaladda. Taasina waxay imanaysaa marka qofka cudurkaasi hayo ee aad la kulanto aad ka daweyso. Sida aad uga daaweynaysaa waa adoo kasmadiisa sare u soo qaada oo tusaaleeya xumaanta qabyaaladdu leedahay, isla markaa ka dhaadhiciya mabda'a ummadda ee hawl iyo hantiwadaag. Sida runta ah haddii qofku fahmo waxa mabda'aasi inoo horseedayo wuu ka xoroobayaa fekeradda gaaban ee qabyaaladda.

## WEYDIIN

1) Sheeg dhibaattoyinka jirey markii bulshadu ku dhaqnayd qabyaalad.

2) Malee sida gumaystuhu uga faa'iideystey qabyaaladda.

3) Goorma ayay qabyaaladdu kaalinteedii ugu weynayd ciyaartay?

4) Waa maxay xumaatada qabyaaladdu u leedahay bulshada?

5) Waa kuwee afkaarta ka soo horjeeda qabyaaladda?

6) Sheeg xilka qof walba ka saaran ciribtirka qabyaaladda.

Casharka 5aad

## SAHYUUNIYADDA CAALAMIGA

Sahyuuniyaddu waxaa weeye dhaqdhaqaaq siyaasadeed oo falsafadiisu tahay, in ay Yuhuuddu tahay dad Ilaahay doortay oo ka fiican dadyowga kale. Ujeedadeedu waxay tahay in loo helo Yuhuudda ku kala firirsan adduunka dhul ay isugu soo ururaan, dhulkaasina waa inuu noqdo dalka Falastiin, taas oo ay ku noolaan jireen kumanyaal sannadood horteed, si looga dhigo Falasstiin waddanka Yuhuudda waa in laga dhammeeyaa Carabta leh ee ku nool.

1. **Aasaaska Sahyuuniyadda iyo Taageeradii Gumeysiga.**

Sahyuuniyadda waxaa aasaasay dad Yuhuud ah oo reer Yurub ah, waxayna soo martay heerar badan, rasmi ahaanse waxay u asaasantay markii la isugu yeray shirkii ugu horreeyey ee Sahyuuniyadda 1897. Shirkaas oo lagu dejiyey siyaasaddii lagaga dhigi lahaa dalka Falastsiin waddankii Ummadda Yuhuudda.

Gumeystayaasha Yurubta Galbeed iyo kan Maraykankuba waxay ku siiyeen Sahyuuniyadda taageero buuxda, sidii looga dhigi lahaa Falastiin waddankii Ummadda Yuhuudda, taageerada gumeystayaashana waxaa u sabab ahaa waxyaalaha soo socda:

1. Awoodda Yuhuudda ku nool dalalka reer Galbeed oo aad u weyneed, sababtu waxay tahay Yuhuudda oo gacanta ku haysay, maantana ku haysa dhaqaalaha iyo lacagta dalalkaas, taas ayaana u suura gelisay Yuhuudda inay ku dirqiyaan dawladaha reer galbeed taageerada Sahyuuniyadda.

2. Dawladaha gumeystayaasha ah oo doonaya inay iska fogeeyaan Yuhuudda ku nool dalalkooda.

3. Waxaa labadaas qodob wehеliya gumeystayaasha, siiba Ingiriiska, oo dana waaweyn ku lahaa Bariga

Dhexe, ayaa markii ay ogaadeen in uu maamulka Bariga dhexe u wareegayo dadyowga ku nool ee Carabta ah, waxay ku fikireen inay ku yeeshaan Bariga Dhexe saldhig ay ku ilaashadaan danahooda, sidaas darteed ayey gumeystayaashu taageero buuxda u siiyeen fikraddii sahyuuniyadda ee ahayd inay Falastiin tahay waddankii Ummadda Yuhuudda, Taageeradaasuna waxay ku shaac baxday Ballantii Belfoor.

**2. Ballantii Belfoor 22-2-1917:**

Belfoor wuxuu ahaa Wasiirka arrimaha debedda ee dalka Ingiriiska. Dagaalkii 1aad dehxdiisii ayaa Ingiriisku wuxuu u baahday lacag uu ku maamulo hawlaha iyo dhibaatada uu dagaalku la yimid, markaas ayey Yuhuuddu u ballan qaaday Ingiriiska inay ku kaakalmayso lacag haddii uu aqoonsado inay Falastiin tahay waddanka Ummadda Yuhuudda, markaas ayuu Belfoor, isaga oo wakiil ka ah dawladdiisa ku dhawaaqay inay dawladdiisu u aqoonsatay dalka Falastiin inuu yahay waddankii Ummadda Yuhuudda.

Tallaabadaas waxay na tusaysaa murtidii ahayd (nin aan lahayn ayaa siiyay nin aan mudan).

3. Habkii ay Sahyuuniyaddu iyo Ingiriisku u abuuree **dawladda Israa'iil:**

1. Ingiriiska oo markaas gacanta ku hayey maamulka dalka Falasstiin, wuxuu u oggolaaday Yuhuudda addunka in ay u soo dhoofaan dalka Falastiin, iyaga uusan waxba ku xidhin.

2. Si loo dejiyo Yuhuudda geeddiga ku iman jirtey dalka Falastsiin, Yuhuudda Caalamiga ahi waxay asaastay wakaalad la yiraaho «Wakaaladda Yuhuudda». Wakaaladda Yuhuuddu iyada oo la kaashanaysa «Sanduuqa Ummadda Yuhuudda», waxay u asaastay Yuhuudda ururo bulshadeed iyo kuwo waxbarasha ah.

3. Wakaaladda Yuhuuddu iyada oo taageero ka haysata Ingiriiska, waxay asaastay ururo argagixiso kiciya oo rara carabta degganayd dalka Falastiin. Isla

markaasna Ingiriisku uma uusan oggolayn carabta inay qaataan hub ay ka la hortagaan Yuhuudda.

Arrinta caynkaas ahi waxay keentay, in ay Yuhuuddu si dhakhsa ah ugu badatay dalka Falastiin, taasina waxay la timid halis, si aan u ogaano khatartaasna, waa in aan tusaale u soo qaadano war bixintii xoghayaha guud ee Jaamacadda Carabta, 1959.

War bixintaas oo ahayd:

1. Qarnigan labaatanaad bilawgiisii tirada Yuhuudda Falastiin waxay ahayd 5,000 oo qof. Taas oo macnaheedu yahay 5% dadka deganaa falastiin, markii uu Balfoor wacdigiisii bixiyey 1917kii tiradoodu waxay ahayd 50 kun oo qof.

2. 1948kii tirada Yuhuuddu waxay ahayd 500,000 oo qof. Haddii aan u fiirsano waxyaalahaas aan soo sheegnay waxaan ka ogaan karaa, in Ingiriisku markii uu ku hubsaday dalka Falastiin gacanta Yuhuudda ayuu faraha kala baxay, taas oo keentay dhalashadii dawladda Israa'iil bishii Maajo 1948kii.

**4. Israa'iil Khatar ayey ku tahay jiritaanka Ummadda Carabta.**

Dawladda Israa'iil waxaa weeye khatar halis gelinaya Ummadda Carabta sida ay waayo-aragnimadu ina tuseyso, maxaa yeelay dawladda Israa'iil laga soo bilaabo 1948kii ilaa taariikhda maanta waxay ku haysaa Carabta dagaal joogta ah iyo dhul durugsi, sabatuuna waxay tahay iyada oo rumeysan in dalka ummadda Yuhuuddu uu yahay inta u dhexeeysa webiga Niil ee mara dalka Masar iyo webiga Furaat ee mara dalka suuriya iyo Ciraaq. Arrintaasi waxay inoogu cadaatay dagaalladii faraha badnaa ee ay Israa'iil ku soo qaaday dalalka Carabata, dagaalladaas oo ah kuwa soo socda:

1. 1956kii Israa'iil waxay ka qayb gashay dagaalkii ay Ingiriiska iyo Faransiisku ku soo qaadeen dalka Masar markii ay Masar la wareegtay biyo mareenka

Suweys, markii uu ciidanka Masar ka soo kacay siinaay si uu uga difaaco Ingiriiska iyo Faransiiska Magaalooyinka ku yaal Qooriga Suweys, Israa'iil waxay qabsatay Siinaay, waxayna ku dhawaaqday in ay ka mid tahay dalka Yuhuudda, ka dib markii ay ka cayrisay Carabtii degganayd.

2. 1967kii gumeystayaashu waxay welwel ka qabeen tallaabooyinka degdegga ah ay Masar u qaadday xagga horumarka iyo xoojinta ciidankeeda, waxayna ogaadeen haddii ay Masar sidaas ku sii socoto in ay khatar gelin doonto danaha uu gumeystuhu ku leeyahay Barriga Dhexe iyo jiritaanka dawladda Israa'iil.

Sidaas darteed waxay goosteen gumeystayaasha iyo dawladda Israa'iil in si deg-deg ah loo joojiyo horumarka Masar. Markaas ayey dawladda Israa'iil iyadoo taageero buuxda ka haysata Maraykanka, siiba xagga hubka iyo ragga dayuuradaha wada, waxay mar kale dgaal lama filaan ah ku soo qaaday Masar, Suuriya iyo Urdun 5tii Juunyo, 1967, waxayna ka qabsatay saddexdaas dalba dhul fara badan. Carabtii degganaydna way ka eriday, guryahoodii, beerahoodii iyo xoolahoodiiba waxa qaatay dad Yuhuud ah. Ka dib, Israa'iil waxay caddeysay dalalkaas ay ka qabsatay Carabta in ay ka mid yihiin dalkeeda.

Dagaalkaas aan soo sheegnay, laba malyan oo carab ah ayaa dhulkoodii loogaga cayriyey, oo maanta ku nool xeryo caydheed. Dhulkoodiina waxa la dejiyey dad Yuhuud ah oo laga soo ururiyey adduunka. Arrimaha caynkaas ahi, waxay inoo caddeynayaan in ay Israa'iil tahay qalabkii uu gumeystuhu ku ilaashanayey danahiisa Bariga Dhexe iyo in ay dawladda Israa'iil weli doonayso inay fuliso siyaasadii Sahyuuniyadda ee ahayd in uu waddanka Yuhuuddu yahay inta u dhexeysa laba webi. Sidaas darteed, Israa'iil dheg uma yeelan go'aannadii badnaa ee ka soo baxay Ummadaha Middoobay ee uu ka mid ahaa: Inay Israa'iil u celiso Carabta reer Falastiin dalkoodii iyo inay **ka** kacdo dalalka ay dagaalka kaga qabsatay Carabta **1967kii.**

## 5. Dagaalkii Oktoobar 1973kii

Dhibaatada ay u geysatay Israa'iil dadka Carabta iyada oo taageero ka haysata gumeysiga, waa mid aad u fool xun, waa mid ina tusaysa in Sahyuuniyadda iyo gumeysiga ayna aqoonsanayn xuquuqda aadamiga iyo xeerarka caalamiga ah.

Dhibaatooyinkaas inkasta oo lagu hayey Carabta muddo ka badan 25 sannadood, haddana Carabtu isma dhiibin, mana ayan quusan, Carabtu iyaga oo ogsoon in uu Mareykanku siiyo Israa'iil iib la'aan hadba hubka ugu cusub, ayey u suurtoowday in Suuriya iyo Masar iyaga oo taageera ka haysta dawladaha Carabta iyo kuwa nabadda jecel; kuna kalsoon awoodooda inay ku qaadaan Israa'iil dagaal lama filaan ah 6dii Oktoobar 1973kii.

dharbaaxo lexaad lehna u geysteen Ciidammada Israa'iil. Dagaalkan in kasta oo ayan Carabtii soo ceshanin dhulkeedii, reer Falastiinna ayan ku noqon dalkoodii, hadana waxaa ka dhashay in ay ahayd markii ugu horreyey oo ay beenowday in ay Israa'iil tahay xoogga aan la is hor taagi karin, markii loo eego xoogaga Bariga Dhexe, waxaa kale oo ka dhashay in gumeystayaashu ogaadeen inayna Israa'iil u ilaalin karin danahooda Bariga Dhexe, arrimahaas waxay dhaliyeen in waan-waan lagu dhammeeyo dhibaatada Bariga Dhexe.

## WEYDIIN

1) Goormaa, Yaase asaasay Sahyuuniyadda Caalamiga ah?

2) Sheeg Ujeedooyinka iyo falsafadda Sahyuuniyadda?

3) Maxay gumeystayaasha taageero u siiyaan Sahyuuniyadda?

4) Wax inooga tilmaan wacdigii Belfoor?

5) Sheeg xiriirka ka dhexeeya Sahyuuniyadda iyo mabda'a sarreeynta caddaanka?

6) Inoo sheeg waxyaalihii ka dhashay dagaalkii Oktoobar 1973?

7) Siday u nool yihiin Carabta reer Falastiin?

Casharka 6aad

## UMMADAHA MIDOOBAY

### 1. Ballanqaad:

Ballan qaadka ummadaha midoobay waxaa ka muuqan kara haddii loo fiirsado yididiiladii iyo ujeeddooyinkii isku midka ahaa ee ay ka lahaayeen dadyowgii ay dawladahoodii ka qayb galeen dhisitaanka ummadaha midoobay. Ballan qaadkaas wuxuu dhigayaa sida soo socota:

Annaga oo ah dadyowga ummadaha midoobay waxaan dusha iska saarnay:

1. In aan ka badbaadino da'da dadka soo socda wax alla wixii dhibaato ah ee la mid ah kuwii ka soo gaaray aadamiga labadii dagaal ee waaweynaa ee dunida ka dhacay hadda ka hor.

2. Waxaanu rumaysan nahay xuquuqda asaasiga ah ee aadamiga, xorriyadda qofka rag iyo haweenba iyo sinnaanta dawladaha kuwa yar-yar iyo kuwa waaweynba.

3. Waa in aan abaabulno sida ay ku suurobi karto caddaalad xurmeynta, heshiisyada iyo qawaaniinta dawliga ah.

4. Waa in aan kor u qaadno nolosha bulshada aadamimiga, taas oo aan ku gaareyno:

   b) In aan ku wada noolaano isa-saamax, nabadgelyo iyo derisnimo wanaagsan.

   t) In aan isugu duubnaano ilaalinta nabadgelyada adduunka.

   j) Innagoo oggol mabaadi' kooban waa in aan kafaalo qaadno in aanan ku isticmaalin xoogagga militariga haddii ayna ahayn dana guud oo khasab ah.

x) Waa in aan ka dhigano ummadaha midoobay qalabkii ay dadyowga adduunka ku gaari lahaayeen horumarka xag kastaaba; xagga dhaqaalaha, bulshada, waxbarashada, iyo wixii la mid ah.

Sidaa darteed, dawladahannagan iyaga oo ay ka wakiil yihiin danjirayaashooda ku shirsan magaalada Saan-Faransiisko, waxay isla oggolaadeen ballan qaadkan ummadaha midoobay, waxayna dhaliyeen urur dawli ah oo lagu magacaabay **Ummadaha Midoobay.**

## 2. Baahidii loo asaasay

Ummadaha Mdoobay ka hor waxaa jirey urur la oran jirey Ururka Ummadaha, saldhigiisuna wuxuu ahaa magaalada «Jineefa». Ururkaas uma yeelan awood, inuu joojiyo dagaalkii koowaad 1914-1918, sababtuna waxay ahayd dawladihii ku jirey oo qaybsamay. Dadyowga adduunku iyaga oo weli la il xun dhibaatadii ka soo gaartay dagaalkii koowaad ee adduunyada wada saameeyey, ayaa waxaa ku dhacay dagaalkii labaad 1939 1945, oo ay dhibaatadiisu aad uga badnayd kii koowaad. Dhibaatada ka timid labadaas dagaal waxay ogeysiisay dadyowga adduunka ayna nabadgelyadu qaybsami karin. Sidaas darteed si looga hor tago wax alla wixii keeni kara dagaal saddexaad, ayaa waxaa lagu fikiray in la dhiso urur u dhexeeya dawladaha adduunka oo dhan, kaas oo ka shaqeeya nabadgelyo waarta iyo ciribtirista gumeysiga, horumarka dadyowga adduunka xag kastaba xagga dhaqaalaha, siyaasadda, waxbarashada, cilmiga, bulshada, caafimaadka, sinnaan iyo caddaalad wada saameeysa aadamiga oo dhan.

Urur kaasina waxaa lagu magaacaabay Ummadaha Midoobay.

## 3. Dhalashadii Ummadaha Midoobay iyo Ujeeddooyinkeedii:

Markii ugu horreysay ee lagu isticmaalay magaca Ummadaha Midoobay, waxay ahayd markii ay danjirayaal ka tirsan 26 Dawladood ay soo saareen baaqii ummadaha midoobay bishii Jannaayo 1942, *baaqaas oo ay iyaga oo ka wakiil ah daw*ladahooda isugu dhaarsadeen inay sii wadaan la dagaalanka

dawladaha isbahaystay ee ah Jarmalka, Jabaanka iyo Talyaaniga.

Baallan qaadka ummadaha midoobay wuxuu cuskanayaa baaqaas waxaana soo dejiyey danjirayaal ka tirsan 50 dawladood oo ku shiray Magaalad San-Faransiisko muddadii u dhexeysay 25 bishii Abriil ilaa 26 Juun 1945, waxaana la saxiixay ballan qaadkan 26 Bishii Juun 1945, wuxuuse dhaqan galay 24 Oktoobar 1945 markii ay saxiixeen Shiinaha, Ingiriiska, Faransiiska, Mareykanka iyo Midowga Soofeyeeti.

Sidaas darteed ayaa lagu magacaabay 24 Oktoobar dharaartii Ummadaha Midoobay. Dawladihii dhisay ummadaha midoobay waxay ahaayeen 50 dawladood, maantana waxay gaareen 138 dawladood, ujeeddooyinka ummadaha midoobay waxaa ka mid ah waxyaalaha soo socda:

1. Ilaalinta nabadgelyada adduunka.
2. Xoojinta xiriirka wanaagsan ee ka dhexeeya dadyowga adduunka.
3. Ciribtirista gumeysiga.
4. Iskaashiga dawliga ah, si looga gaaro guul dhibaatooyinka adduunka xagga dhaqaalaha, bulshada, aqoonta, caafimaadka, bani'aadamnimada iyo in la badbaadiyo, sarana loo qaado xurmeynta xuquuqda qofka iyo xorriyadiisa asaasiga ah.

**4. Qaybaha ugu waaweyn Ummadaha Midoobay iyo Shaqooyinkooda.**

**Guddida Guud**

| | |
|---|---|
| **Xoghaynta Guud** | **Golaha Nabadgalyada** |
| **Maxkamada Cadaalada** | **Golaha Wisaayadda** |

**Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada**

Ummadaha midoobay waxay ku fushataa shaqadeeda guddiyaal kala geddisan oo iyada ka tirsan, waxaana ka mid ah lixda qaybood ee sare.

## 5. Guddida Guud

### a) Dhismaheeda

Guddida guud waxaa weeye qaybta ugu weyn qaybaha Ummadaha Midoobay, waxayna ka kooban tahay dawladaha ku jira ummadaha Midoobay oo dhan. Dawlad kastana waxaa u jooga xarunta ummadaha midoobay ergo aan ka badnaan karin shan qof. Ergo kastana waxay leedahay hal cod oo keli ah. Guddida guud waxay ku shirtaa caadi ahaan xarunta ummadaha midoobay sannadkiiba mar. Waxaase jirta in ay si deg-deg ah u shirto marar kale, haddii loo baahdo oo loo helo shuruudihii ay ku shiri lahayd.

## 6. Guddida guud waxay codka u bixisaa laba siyaalood:

1. Haddii ay arrinta codka loo qaadi ay mid muhim tahay waa in ay siiyaan codkooda laba-saddexaadka dadka shirka joogaa markaas;

2. Haddiise ay arrintu tahay mid sahlan waa in ay dheeraadaan dadka codka siinayaa dadka diidan ugu yaraan cod.

### b) Shaqadeeda:

Shaqada guddida guud waxay kulmisaa guud ahaan wax alla wixii la xiriira ummadaha midoobay, isla markaasna waxay kormeertaa hawsha qaybaha kale ee ummadaha midoobay. Waxaa kale oo ka mid ah shaqadeeda waxyaalaha soo socda:-

1. Inay fiiriso tiirarka uu ku taagan yahay iskaashiga adduunku iyadoo ilaalinaysa nabadgelyada adduunka.

2. Inay baarto wax alla wixii goodi u keeni kara nabadgalyada adduunka iyadoo dardaaran ku bixin, sida ugu habboon ee lagu joojin lahaa gooddigaas.

3. Inay baarto, dardaaranna ku bixiso, wax alla wixii suura gelinaya waxyaalaha soo socda:
   a) Xoojinta iskaashiga siyaasiga ah ee dawladaha adduunka.
   b) Horumarinta qawaaniinta dawliga ah.

t ) Kafaalaqaadidda xuquuqda aadamiga iyo xorriyaddiisa asaasiga ah.

j ) Kordhinta isku tiirsiga dawliga ah xagga dhaqaalaha, bulshada, dhaqanka, barbaarinta iyo caafimaadka.

4. Waxay u soo doorataa golaha nabadgelyada 10ka xubnood ee aan joogtada ahayn.

5. Waxay baartaa oo ay sugtaa, dawlad walbana u goysaa qaybta ay ka bixin miisaaniyadda ummadaha midoobay.

**t ) Awood Darrida Gudida Guud:**

Guddida guud ma ay laha awood ay ku fuliso go'aannadeeda, waxa kaliya ay kartaa waa inay ka bixiso go'aankeeda dardaaran. Sidaas darteed dawladii doontaana way fulisaa dardaarankaa, tii doontaana way iska diidaa.

**7. Golaha Nabadgelyada:**

**b) Dhismihiisa**

Golahan wuxuu ka kooban yahay shan xubnood oo joogta ah, kuwaasoo ah danjirayaasha Shiinaha, Ingiriiska, Faransiiska, Mareykanka iyo Midowga Soofiyeti iyo toban xubnood oo ay soo doorato Guddida Guud labadii sannadoodba mar. Golahan waxaa saldhig u ah xarunta ummadaha midoyoobay, wuxuuna ku shiraa mar alla markii loo baahdo, waxaase u bannaan inuu ku shiro meela kale haddii loo baahdo, sidii dhacday markii uu ku shiray Adis Abaaba 1972.

**t ) Shaqadiisa**

Shaqada golaha nabadgelyada waxaa ka mid ah waxyaalaha soo socda:

1. Ilaalinta nabadgelyada adduunka isagoo cuskanaya Ujeedooyinka iyo mabaadida ummadaha midoobay.
2. Baarista iyo caddeynta wax alla wixii halis gelin kara nabadgelyada adduunka, isla markaasna wuxuu ku dardaarmaa sidii loo joojin lahaa.

3. Wuxuu u dardaarmaa guddida guud in ay ogolaato doorashada xoghayaha guud ee ummadaha midoobay, iyo dawladaha cusub ee ku soo biiraya ummadaha midoobay.

4. Wuxuu la wadaagaa guddida guud doorashada garsoorayaasha maxkamada cadaaladda.

j) **Cod Bixintiisa**

Golahani wuxuu codka u qaadaa laba siyaalood:

1. Haddii ay arrinta codka loo qaadi tahay mid muhim ah, waa inay siiyaan codkooda ugu yaraan sagaal qof oo ay ka mid yihiin codadka danjirayaasha dawladaha joogtada ah oo dhan. Haddiise uu diido mid ka mid ah shantaa joogtada ah, waa in la joojiyo baadhista arrintaas, ama waxaa lagu wareejin guddida guud. Diidadaas dawladaha waaweyn waxaa la yiraahdaa codka Burinta (Vito).

2. Haddiise ay arrinta codka loo qaadi mid sahlan tahay waxaa lagu kaaftoomi sagaal cod, codad kastaba ha ahaadeene.

8. **Golaha Wisaayadda.**

Ummadaha midoobay iyagoo cuskanaaya qodobka 12aad iyo kan 13aad oo kamid ahaa ballaan qaadkooda, waxay dhaliyeen guddi lagu magacaabay golaha wisaayadda, kaas oo wakiil ahaa Ummadaha Midoobay maamulka 11 dal oo ay Koonufrta Soomaaliya ka mid ahayd. 11kaas dalna intoodii badnayd waxay gaareen gobannimaddoodii. sidaas darteed shaqada golahani aad bay u yaraatay.

9. **Golaha dhaqaalaha iyo bulshada**

b) **Dhismihiisa.**

Golahan wuxuu ka kooban yahay 27 xubnood oo ay soo doorataay guddida guud sannadkii walba sagaal xubnood muddo dhan saddex sannadood, xubin kastana wuxuu leeyahay cod kaliya, kolkii arrin cod loo qaadi, waa inay dadka codka siinayaa dheeraadaan dadka diidan ugu yaraan hal cod.

**t) Shaqadiisa.**

Waxaa ka mid ah shaqadiisa waxyaalaha soo socda:

1. Waxaa xil ka saaran yahay hawlaha ummadaha midoobay xagga dhaqaalaha iyo bulshada.
2. Wuxuu baaraa, dardaaranna ka bixiyaa arrimaha dawliga ah xagga dhaqaalaha, bulshada, dhaqanka, barbaarinta iyo caafimaadka.
3. Wuxuu isugu yeeraa fadhiyo dawli ah si loo baarto arrimaha la xiriira shaqadiisa.

**j) Laamo ka tirsan Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada.**

Golahan wuxuu ku fushadaa shaqadiisa laamo kala geddisan oo isga ka tirsan kuwaas oo ah:

1. Laanta tirakoobta.
2. Laanta horumarinta bulshada.
3. Laanta dejinta reer miyiga.
4. Laanta la daalanka mukhadaraadka.
5. Laanta xuquuqda aadamiga.

Waxaa kale oo la shaqeeya golahan laamo u gaar ah qaaradaha, waxayna baaraan hawlaha dhaqaalaha ee qaaradahaas siiba xagga horumrinta xoogga koronta, gaadiidka gudaha iyo ganacsiga. Waxayna yihiin:

1. Laanta dhaqaalaha ee Yurub.
2. Laanta dhaqaalaha ee Afrika.
3. Laanta dhaqaalaha ee Laatiin Ameerika.
4. Laanta dhaqaalaha ee Aasiya iyo bariga fog.

**10. Maxkamadda Cadaaladda:**

**b) Dhismaheeda:**

Saldhigeedu waxaa weeye magaalada Laahaaya dalka Hooland, waxayna ka kooban tahay 15 garsoore oo ay soo doortaan guddida guud iyo golaha nabadgelyada mid waliba gaar ahaan, muddada shaqada loo soo doorto garsooraha waxaa weeye 9 sannadood.

Markii cod loo qaadi arrin, waxaa la raacaa dhinaca ay codadku u bataan, haddiise ay isla ekaadaan waxaa la raacaa dhinaca uu la jiro guddoomiyaha maxkamadda ama wakiil-kiisa, haddii uu san joogin isagu.

**t ) Shaqadeeda:**

Shaqada maxkamaddu waxaa ugu weyn inay baarto wax alla wixii isdiid ah ee ku dhex mara dawladaha xagga arrimaha soo socda:

1. Caddeynta Heshiisyada iyo qawaaniinta dawliga ah.
2. Waxay baartaa wax alla wixii goodi u keeni kara he-shiisyada dawliga ah.
3. Waxay caddeysaa ra'yigeeda wixii ku saabsan xag-ga qawaaniinta, markii ay weydiistaan qaybaha kale ee ummadaha midoobay.

Maxkamaddu ma ay laha awood ay ku fuliso xukunkeeda, waxa kali ah ay kartaa, waa inay bixiso dardaaran, sidaas darteed dawladdii doontaana way fulisaa xukunka maxkamada, tii doontaana way iska diidaa.

**11. Xoghaynta Guud.**

**b) Dhismaheeda:**

Xoghaynta guud waxay ka kooban tahay shaqaalaha ka shaqeeya Ummadaha Midoobay oo dhan, shaqaalahaasi waxay socodsiiyaan hawlaha qaybaha kala geddisan ee Ummadaha Midoobay, waxaana madax ka ah, Xoghayaha guud ee Ummadaha Midoobay.

**t ) Shaqada Xoghayaha Guud.**

Shaqadiisu aad iyo aad bay u badan tahay, sida ay u badan tahay dhibaatooyinka, ay baarto ummadaha midoobay, waxaase ka mid ah shaqadiisa waxyaalaha soo socda:

1. Wuxuu dhexdhexaadiyaa dawladaha is diidan.
2. Wuxuu ku dadaalaa ilaalinta nabadgelyada adduun-ka.

3. Wuxuu tusaa golaha nabadgelyada wax alla wixii halis gelin kara nabadda.

4. Wuxuu la baartaa dawladaha dhibaatooyinka xagga dhaqaalaha adduunka.

5. Wuxuu kormeeraa sida loo fuliyo go'aannada ummadaha midoobay. Xoghayuhu wuxuu ula kaashadaa shaqadiisa shaqaalaha Xafiiska Xoghaynta guud iyo niman xog ogaal u ah xag kastaba.

## 12. Soomaaliya iyo Ummadaha Midoobay.

Soomaalida koonfureed waxay ka mid ahayd 11kii dal ay Ummadaha Midoobay dusha iska saareen, inay ku dul ilaaliyaan dawlad'hii loo dhiibay. Sidaas darteed ayaa bishii Nofembar 1949kii guddida guud ee ummadaha Midoobay go'aan ku gaartay in uu Talyaanigu gacanta ku hayo koonfurta Soomaaliya muddadaas 10ka sannadood ah.

## 13. Xilligii wisaayadda 1950-1960

Ummadaha Midoobay kuma aynan deynin Talyaaniga oo kaliya maamulka koonfurta Soomaaliya ee way ku dul ilaalineysay. Sidaa darteed waxay sameysay guddi lagu magacaabay golahii la tashiga, kaasoo ka koobnaa dawladaha Masar, Filibiin iyo Kolombiya. Shaqada golaha la tashiga waxaa ugu muhumsaneed hadba inuu kula taliyo maamulkii u joogay Talyaaniga Soomaaliya sida ugu habboon ee hore loogu marin lahaa dadka Soomaaliyeed xag kastaba xagga siyaasadda, dhaqaalaha, waxbarashada iwm.

Waxaa kaloo shaqadiisa ka mid ahayd, inuu goor iyo ayaan la kulmo dadweynaha Soomaaliyeed, isaga oo weydiinaya waxa ay doonayaan isla markaasna u gudbinaya guddida guud.

Sidaas warteed guddida guud iyada oo tixraacaysa dardaaranka golaha la tashiga, waxay diiday in laga badiyo muddadii wisaayaadda 10 sannadood sida ay doonayaan dad yar oo u adeegayey Talyaaniga, waxayna go'aan ku qaadatay in hore loo soo mariyo waqtiga gobannimada lix bilood sida ay dadweynaha Soomaaliyeed weydiisteen. Taasina waxay keentay in ay koonfurta Soomaaliya gobannimadeedii qaadatay 1dii uLuliyo 1960.

Sidaas wanaagsan ayuu golahii la tashigu ula soo shaqeeyey dhaqdhaqaaqii gobannimadoonka soomaaliyeed xilligii wisaayaadda, siiba danjirihii Masar oo Naftiisii u huray, dhiigiisii qaal'ga ahaana ku qubtay isagoo u halgamaya gobannimada Soomaaliyeed.

## 14. Xiriirka u Dhexeeya Soomaaliya iyo Wakaaladaha Ummadaha Midoobay.

Horay baan u soo sheegnay qaybta weyn ee Ummadaha Midoobay ka soo qaadatay gobannimadii Soomaaliya, intii ka dambeyseyna kaalmo weyn ayey Jamhuuriyadda Soomaaliya ka heleysey wakaaladaha kala geddisan ee Ummadaha Midoobay. Wakaaladahaasna waxaa ka mid ah:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wakaaladda Cuntada iyo beeraha | F.A.O. |
| 2. | Wakaaladda Caafimaadka | W.H.O. |
| 3. | Wakaaladda Shaqada | I. L. O. |
| 4. | Wakaaladda Cilmiga, bulshada yio dhaqanka | U.N.E.S.C.O |

## 15. Ummadaha Midoobay iyo Yididiiladii Dadyowga Adduunka

Inkasta oo ay ummadaha Midoobay qayb weyn ka qaadatay sida ay u gaareen gobannimadooda in ka badan 50 dawladood maanta ka mid ah iyada, lana gumeysan jirey waagii la asaasay 1945, haddana dadyowga adduunku ma ayna wada gaarin ujeeddadii ay ka lahaayeen Ummadaha Midoobay, waxaana inoo caddeynaya arrintaas iyada oo ay ka soo wareegtay waagii la asaasay 29 sannadood in ay jirto Afrika iyo Aasiya gumeysigii ugu xumaa ee soo maray taariikhda adduunka, kaas oo ah midabtakoorka iyo sahyuuniyadda iyo dalal badan oo la gumeysto oo ay ka mid yihiin dhulalka Soomaaliya, ee maqan. Waxaa kale oo jira in ay gumeystayaashu siiba Mareykanka ku xadgudbaan dawladaha adduunka si ay u ilaashadaan dhiigmiiradnimadooda, dhaqaalaha adduunka.

Ummadaha Midoobay waxba ka ma ayna qabanin arrimahaas waxaana u sabab ah laba qodob ee soo socda:

1. Haddii aan u fiirsanno ballan qaadka Ummadaha Midoobay waxaan arkaynaa in ayna lahayn awood ay ku joojiso dawladdii ka tallaabsata ballan qaadkeeda iyo awood ay ku fuliso go'aanadeeda.

2. Dawladaha waaweyn siiba Mareykanka oo ugu shaqaysta ummadaha Midoobay in ay ku gaaraan danahooda gaarka ah, taasna waxaa u tusaale ah labada qodob ee soo socda:

**16. Kongo (Saa'iir) 1960**

Jamhuuriyadda Koongo markey gobannimadeedii qaadatay ayey dad yar oo u adeegayey gumeysigii Beljiinka qalaanqal ka sameeyeen waddanka, isla markaasna, si deg-deg ah ayuu u soo noqday ciidankii Beljiinka. Markaas ayey xukuumadii Kongo ee sharciga ku dhisnayd oo uu ka madax ahaa Lamuumba waxay weydiisatay Ummadaha Midoobay ciidan taageera siiya, si loo helo xasilooni; Ummadaha Midoobay si deg-deg ah ayey ugu soo direen ciidan. Laakiin meeshii laga filayey inuu ciidankaas, taageero siiyo xukuumadii sharciga ku dhisnayd ayuu Mareykanku ugu shaqeeystay ciidankaas inuu ku rido xukuumadii sharciga ahayd. Taasina waxay keentay in si fool xun loo dilay geesigii Koongo Lamuumba.

**17. Koreeya 1950**

Golaha nabadgelyada isaga oo ay ergadii Midowga Soofiyeeti ka maqan tahay wuxuu go'aan ku qaatay in ay Ummadaha Midoobay u dirto ciidan dalka Koreeya, 16 dawladood oo ay Axmaaradu ka mid ahayd ayaa ciidan u dirtay, Mareykankuna wuxuu ugu shaqeystay ciidankaas inuu kula dagaalamo dadweynihii Koreeya ee u halgamaayey mideynta dalka Koreeya, dagaalkaasi wuxuu socday ilaa 1953kii wuxuuna is hor taagay mideynta dalka Koreeya, taas oo ilaa maanta ay u qaybsan yihiin laba meelood.

## WEYDIIN

1) Goormaa, xaggeebaase, maxaase loo asaasay Ummadaha Midoobay?

2) Immisaa dawladood ayaa ka qayb galay asaaskii ummadaha Midoobay? Immiseyse gaareen 1974kii?

3) Sheeg ujeedooyinka Ummadaha Midoobay?

4) Maxaa u sabab ah awood darrida Ummadaha Midoobay?

5) Si tifaftiran uga sheekee dhismaha, shaqada, cod bixinta, golayaasha soo socda; guddida guud, golaha nabadgelyada, maxkamada caddaaladda iyo golaha dhaqaalaha iyo bulshada.

6) Shaqada golaha wisaayadda aad bay u yaraatay maanta, maxaa ugu wacan?

7) Sidee bay ula shaqeeysay Ummadaha Midoobay Soomaaliya xilligii wisaayadda?

8) Dadyowga adduunku si bay u arkaan Ummadaha Midoobay, gumeystayaashuna si kale ayey u arkaan, si tifaftirsan uga sheekee labadaas aragti.

9) Ka sheekee golahii la tashiga, siiba Kamaaludiin Saalax sida uu ugu soo halgamay dadka Soomaaliyeed gobannimadooda.

Casharka 7aad

# HANTIWADAAGGA CILMIGA KU DHISAN

## 1. Mabaadiida Guud ee Hantiwadaagga

Mabaadiida guud ee hantiwadaaggu waxay ka soo horjeeddaa habka hantigoosadka ah. Waxayna baabi'inaysaa isku dul-noolaadka kooxda yari ku dhaqanto. Hnatiwadaaggu waa hab daryeelaya nolosha dadweynaha faraha badan. Taas yuuna uga duwan yahay hantigoosadka oo koox yar danaheeda daryeelaya. Hantiwadaaggu wuxuu tixgelinayaa, in si sinnaan iyo cadaaladi ku jirto loo qaybiyo wax kasta oo ay bulshadu soo wada saarto.

Bulshada hantiwadaagga ahi waa mid wadaagta dhibta iyo dheefta, oo aan keligii cune meel ku lahayn. Jaalle Siyaad tilmaan ayuu ka bixiyey markuu yiri «Hantiwadaaggu waa aan wada noolaano, aan sinnaano, aan isdhawrno, wax wada qabsanno, aan wada qaybsanno, kibir ma leh, xumaan kale ma leh, wuxuu qirayaa qiimaha aadaminnimada.»

Habka hantiwadaagga ahi wuxuu leeyahay qorsheyn xagga dhaqaalaha ku saabsan oo isaga u gaar ah. Waxayna qorsheyntaasu ku dhisan tahay in qof kasta oo bulshada ka mid ah laga daryeelo dhinaca nolosha guud, waxbarashada, caafimaadka, iwm. Habka Hantiwadaagga ahi wuxuu ku dhisan yahay in dadweynuhu wada lahaado qalabka wax lagu soo saaro. Macnuhu waxaa weeye wax kasta oo wax lagu tacbo inay beesha ka wada dhexeeyaan.

Dadka ku shaqeeya qalabka wax lagu soo saarana, xiriirka ka dhexeeyaa, wuxuu ku habeysan yahay iskaashi iyo wax wada qabsi. Lahaanshaha guud iyo wada shaqeynta, waxaa dhinac socda ayadoo la wada leeyahay dheeftii ka soo baxda wada jirkaas. Taas oo ah in si cadaalad ah loo qaybiyo dheeftaas, ayadoo lagu daryeelayo nolosha dadweynaha.

Jaalle Siyaad wuxuu tilmaan ku bixiyey «Hantiwadaagga waa kan keli ah ee suura gelin kara, inuu nin kastaaba aqoonsado waxa la yiraahdo qofka aadamiga ah qiimiihisa.»

Hantiwadaagu wuxuu ka soo horjeedaa oo burburinayaa dabaqadaha kala sarreeya, ee isku dulnool. Dabaqadahaas oo habka Hantigoosadka ah isku dulnool. Dabaqadda sarena ay ku nooshahay dhiigga iyo dhididka kuwa kale oo ka kooban dadweynaha faraha badan. Dabaqadahaas lagu dulnool yahay waxaa ka mid ah, shaqaalaha, beeraleyda, raacatada, dhallinyarada iyo ciidammada iwm. Habka Hantiwadaagga ahi wuxuu awoodda ka qaadayaa dabaqadaas sare, oo kooxda yar ah. Wuxuuna ku wareejinayaa awooddii dabaqadda xoogsatada ah, oo ka kooban dadka intiisa badan.

Hantiwadaaggu wuxuu kale oo xukunka gacanta u gelinayaa xoogsatada, kuwaas oo ku wadaya si cadaaladi ku jirto. Ayagoo hantidooda ka ilaalinaya dayaca, keli goosadka iyo kuwa hanqalka u taagaya inay keligood hantida dadweynaha cunaan. Haddii aan soo koobno mabaadii'da waaweyn ee hantiwadaagga, waxaan oran karnaa:

1. Ma jirto hanti gaar ah oo gooni loo leeyahay, qalabka wax lagu tacbo iyo wixii la soo saaro, waxaa wada leh dadweynaha. Mana jirto qof qof kale ku shaqeysan kara.
2. Qaybinta dheeftu waa mid ku dhisan cadaalad iyo sinnaan, mana jirto eexasho iyo qaraabakiil.
3. Hantiwadaagu ma oggola dabaqado kala sarreeya oo isku dulnool. Wuxuuna daryeelayaa danaha guud ee dadweynaha.
4. Halbowlaha dhaqaalaha: beeraha, warshadaha, bangiyada . . . . . iwm.
   Wuxuu ku wareejinayaa gacanta dadweynaha.
5. Qorsheynta dhaqaalaha waxaa loo habeynayaa sidii looga bixi lahaa baahida, ayadoo la kala hor marinayo sida ay u kala daran yihiin waxyaaluhu.
6. Tacabka bulshada soo saarto waxaa maamulkiisa iyo ilaalintiisaa iska leh shaqaalaha.
7. Kacaanka hantiwadaagga ah waxaa hoggaaminaya xoogaga horusocodka ah.

8. Hantiwadaaggu wuxuu wataa kacaan bulshadeed oo lagu xidida siibayo ceebaha iyo isburinta ay bulshada hantigoosadka ahi leedahay. Waxaana looga dan leyahay xidida siibkaas in la gaaro nolol barwaaqo iyo nabad geliyo leh.

## 2. Waqtiga u gudbidda Hantiwadaagga.

Qarnigii 20aad dawlado badan oo ka koobau qaaradaha kala geddisan ee adduunka ayaa gobannimadoodii ka dhacsaday gumeystaha, iyadoo dhiig badani ku daatay. Hase yeeshee dawladaha badankoodii oo ay Soomaaliya ka mid ahayd kumay guuleysan lamana hirgelin ujeedooyinkii gobannimada. Taasoo ay ugu wacnayd ayagoo u hoggaansamay maamulkii gumeysiga cusub.

Xagga nabadgelyada, dhaqaalaha, dhaqanka iyo siyaasadaba markay Soomaaliya heer halis ah gaartay ayey lagama maarmaan noqotay in dadkii iyo dalkii Soomaaliyeed la caymiyo. Ciidamada qalabka sida oo taageera buuxda ka haysta dad-weynaha Soomaaliyeed ayaa xukunkii dalka xilkiisii la wereegay 21kii Oktoobar 1969.

Si loo badbaadiyo nabadgelyada dhaqanka, dhaqaalaha iyo siyaasada ummaddaba, waxaa lagama maarmaan noqotay in la beddelo habkii hantigoosiga oo la qaato habka hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan, si loo gaaro sinnaan, caddaalad iyo horumar deg-deg ah.

Taariikhdu waxay caddeysay in waddamada soo koraya ee qaatay hantiwadaagga iyagoo ka faa'iideysanaaya waayo-aragnimadooda iyo tan waddammada hantiwadaagga ku dhaqmo, in ay gudbi karaan heerka hantigoosadka ah oo ay u gudbi karaan heerka hantiwadaagga. Si la isugu dubbarido dhaqaalaha iyo siyaasaddaba waa lagama maarmaan in la maro ama la galo waqtiga u guuridda hantiwdaagga oo la hirgeliyo xeerarka loo baahan yahay waqtigaa isaga ah, si loo baabi'iyo isku kor noolaasho, oo la gaaro hantiwadaag. Waa maxay xeerka la rabo in la hirgeliyo?

Hoggaanka xukunka oo ay qabtaan dadweynaha sha-

qeeya iyo ciidamada horumarka jecel iyagoo leh urur hantiwadaag ah.

2. Iskaashiga shaqaalaha horusocodka ah, beeraleyda iyo dadweynaha.
3. Baabi'inta habka hantigoosiga iyo hirgelinta wadalahaanta baraaraha iyo qalabka wax lagu soo saaro.
4. Xooggeynta dhaqaalaha hantiwadaagga iyo abaabulka iskaashatooyinka beeraha.
5. Qorsheynta dhaqaalaha hantiwadaagga iyo daryeelidda nolosha ummada.
6. Hirgelinta aydiloojiyada hantiwadaagga, dhaqanka, tacliinta iyo abuuridda iskaashiga indheer garatada iyo shaqaalaha.
7. Baabi'inta is cadaadiska iyo is adoonsiga iyo hirgelinta sinnaanta iyo caddaaladda.
8. Badbaadinta baraaraha iyo miraha hantiwadaagga xagga cadowga debedda iyo gudaha.
9. Hirgelinta nabadgelyada, iskaashiga taageerada shaqaalaha adduunka iyo dawladaha hantiwadaagga ku dhaqmo iyo ururrada gobannimadoonka.
10. La dagaalanka imberiyaalistaha iyo dibusocodka oo dhan.

Kacaanka isagoo cuskanaaya qodobada kor ku qoran ee waqtiga u gudbidda hantiwadaagga ayuu ku dhaqaaqay inay gancanta ummadda geliyaan halbowlihii dhaqaalaha ee maalqabeenka gacantooda ku jirey, gaar ahaan ku qalaad. Sida Bettroolka, baananka iyo warshadaha iwm.

Dhaqaalaha ummadda la wareegtay wuxuu gogoldhig u noqday baraaraha qaybta hore ee hantiwadaagga (Socialist sector).

1. Qaybta hantiwadaagga oo ah halboowlaha dhaqaalaha ee waddanka, waa lagama maarmaan in si habon loo qorsheeyo gaar ahaan sancada iyo beeraha oo is bar bar socda.
2. Waaxda hantiqabeenka ee dhaqaalaha oo mar walba isku dayda inay tartan la gasho oo ay ka guuleysato waaxda hantiwadaagga, ayey waqtiga isaga ah lagama maarmaan noqotay, in kacaanku qorsheeyo ganac-

siga gudaha ka dibedda iyo maamulka qiimaha, si loo daryeelo danaha dadweynaha, loogana foojignaado in hantiqabeenka ganacsiga iyo gumeysiga ummadda ku sii tartamaan.

3. Waaxda ganacsiga yar-yar ee ka kooban sancada hoose, beeraleyda saboolka ah, iskood u xoogsatada kala geddisan iyo baayac-mushtarka yar-yar, waa lagama maarmaan guutooyinkaasi inay ururaan, oo ay iskaashatooyin sameeyaan oo u dhex ah, taasoo talo iyo taageeraba kacaanku ula heegan yahay.

## WEYDIIN

1. Tilmaan sida u hantiwadaaggu u daryeelo nolosha aadamiga.
2. Maxaa loola jeedaa qalabka wax lagu soo saaro? Yaase iska leh?
3. Xoogga wax soo saaro xiriirka ka dhexeeya waa sidee?
4. Sidee loo qaybiyaa dheefta ay bulshada hantiwadaagga ahi soo saarto?
5. Hantiwadaagga wuxuu ka soo horjeedaa dabaqadaha kala sarreeya oo bulshada hantigoosadka caan ku tahay, inoo sheeg aragtida hantiwadaagga xagga dabaqadaha.
6. Dhaqaalaha meelaha halbowlaha u ahi yaa iska leh? Qorsheynta dhaqaalahase yaa gacanta ku haya?
7. Hantiwadaagga Kacaanka bulshadeed u wato waa maxay?
8. Inoo tilmaan xoogaga horusocodka ah ee kacaankenenna hantiwadaagga hoggaaminaya?
9. Maxaynu u dooranay Hantiwadaagga?
10. Maxaa loola jeedaa waqtiga u gudbidda hantiwadaagga?
11. Inoo sheeg saddex qodob oo la rabo in la hirgeliyo waqtigaa isaga ah?
12. Maxaa lagama maarmaan ka dhigay in Kacaanku qorsheeyo ganacsiga gudaha?

Casharka 8aad

# ISKAA WAX U QABSO

## 1. Waa isla tashi Ummadnimo

..... Markii aan xorriyadda siyaasiga hellay waxaan u madaxbannaanaanay shaqada dalkeenna: in aan habkii aan doonno ugu shaqeyno dalkeenna annagoo sidii aan rabno u tallabsanayna. Marka aan dhaqaalaha ka xorowno, waxaan gaaraynaa oo la sinmaynaa asaageen .... dadka ina ka horreeya .... siiba Galbeedka, dabadeedna waa dhaafaynaa asaageen iyo gaar ahaan Galbeedka, maxaa jira innagaa ilbaxnimada uga horreyney, ka taariikh fog oo ka dhaqan fiican, taasina waxay ku imaan kartaa markii aan isla tashano oo iskeen u dhaqaaqno oo rumayno awooddeenna aan dhammaandka lahayn oo aan kala go'in.

Fasalka Shanaad, waxaan ku soo qaadannay in Iskaa wax u Qabso tahay «Is-aqoonsi Ummadnimo» oo ah in ay ummaddu aqoonsato, ku faanto oo noolayso afkeeda, dhaqankeeda, taariikhdeeda iyo suugaanteeda, ayna aamminto inay la mid yihiin kuwa dadyowga kale ee dunida ama ay ka horumarsan yihiin qaarkood. Waxaad aqoonsan kartaa oo ku faani kartaa dhaqankaagaa iyo taariikhdaada marka aad dib u ugu noqotid oo aad baartid, baratid, oo aad ogaatid qiimahooda iyo sida ay hodan u yihiin, dabadeedna aad ku dhaqantid, kuna faantid.

Markii gumeystayaalku ay haysan jireen dalkeenna waxay ku dadaaleen inay dhaqankeenna dooriyaan oo ay taariikhdeenna aasaan, dhaqankoodii iyo taariikhdoodiina wey ina ku faafiyeen si aan u jeclaanno oo ay noola weynaadaan. Macnahu waxaa weeye in dadkoodu ka fiicnaadaan dadkeenna, maxaa jira qofkii kaa dhaqan fiican (horukacsan) kaa fiican. Siyaasaddaas ah dhaqan guuriska waxaa lagu magacaabaa «Gumeysiga dhaqanka» waana kan ugu xun.

Gumeysigu wuxuu rumaysnaa inayan suuragal ahayn in la haysto «dal» iyadoo aan dhaqankiisa la doorin. (Farantz Fanon) wuxuu ku qoray Kitaabkiisii «A Dying Colonialism» (Gumeysigii sii dhimanayey). Markii ay gumeystayaalku wax

badan haysteen dalalkii ay addoonsan jireen, waxay isku canaanteen guul darradii ka raacday **gumsysigii dhaaqanka** iyo sidii ay ugu hungoobeen inay dooriyaan dhaqammadii dadyowgii ay haysteen, waxyana ku qayliyeen: «Ma suurowdo in la haysto **dal dadkiisu xor yahay»**. «Dal waxaa la oran karaa waa la qabsaday marka dhaqankiisa iyo taariikhdiisa la dooriyo oo la dugo. Kolkii dagaalkii Aljeeriya socday, Faransiiska waxaa argagixiso ku noqday «gabadhii Shukada lahayd», gadadhii dhaqankeeda haysatay. Askartii Faransiisku waxay ka baqeen, waxa ka dambeeya wajiga qarsoon! waxayna is oran jireen «wejiga qarsooni wadkeennuu sidaa», «haddaan doonayno in aan burburinno mujtamaca Aljeeriya, aan marka hore burburrinno gabadha Aljeeriya». «Doori hoyada adaa ninka ka adkaan doonee». Farantz Fanon wuxuu inoo sheegay in Faransiisku, markaas ka dib ku duuley gabadhii Aljeeriya. Waxay ku qaadeen olole cay ah: «Wax aan dadnimo lahayn!, khashiin dambeeya! «Weli ma Carab baad tahay? dabeecadaada ka tageysid? Kiilo kastoo soor ah oo la beegto, waxaa la socday darsi cay ah!!, haddana waxay u raacin jireen hanuunis!! Laakiin dadka reer Aljeeriya waxay fahmeen dhagarta gumaysiga waxayna sii xoojiyeen dhaqankoodii. Aljeeriya keliya ma ahayn. Meel kasta oo uu gumeysigu qabsaday sidaas ayuu u galay. Markii gumesigu isku dayaba inuu toos u caayo oo uu qayma dilo, waxaa bata carada dadka la haysto iyo halgankooda.

Gumaysigu wuxuu ku caayi jirey dadka madow «Negro». Wuxuu ula jeeday inay waayaan dadnimadooda, hase yeeshee, dadkii madoobaa waxay soo saareen fikrad: «Negritude» oo ah soo noolaynta iyo ku faanka **dhaqanka dadyowga madow**, ka dibna waxay isu beddeshay «fikrad» hub u noqotay halganka lagu doonayey sharafta qofka aadamiga ah, waxayna oran jieern «xataa siyaasaddu waxay noo tahay waji ka mid ah dhaqanka».

Gumeysiga yurubta Galbeed ayaa sabab u ah dibudhaca iyo dhibaatada maanta haysata dadyowga «dunida saddexaad». Runtaas waxaa ku caddeeyey nin ka mid ah raggooda wax qora ee horusocodka ah (Roojee Gaaruudi) markii uu yiri, «Haddii dadyowga Afrika iyo Aasiya ayan hindisin cilmi teknikada ah ee la mid ah kan aan innagu (reer Yurub) hindisney, taasi

waxay ku timid gumeysiga oo ka diley dadyowgaas ruuxa, oo ka joojiyey inay sii wadaan horukacooda, oo ka siibey taariikhdooda oo u diiday inay xurmeeyaan qiyamkooda (dhaqankooda) ficilkaasna waa dembi aan ka yarayn dadnimada oo ruuxa laga siibo, laga dilo. Dhaqdhaqaaqyadii gobannimodoonka ahaa wixii u cayntay waxaa ugu weynaa dhaqanka.

Gumaysiga dhaqanku waa ka ugu xun. Raadka uu kaaga tago waxaa ugu weyn «Guntinta la weeynaanta», inay kula fiicnaadaan oo kula weynaadaan wax kasta oo aan waddankaagu lahayn, waxaaga iyo waxa dalkaaguna ay kula xumaadaan.

Waxa kula xun ama kula weyn ma aha shayga laftiisa ee waa sida uu kula dhadhamayo ama uu maskaxdaada ugu tallaalan yahay, taasna waxaa keena «barbaarinta». Barbaarin kasta waxay salka ku haysaa dhaqan ummadeed. Gumeysigu wuxuu nagu barbaariyey dhaqankiisa, si aan u yeelanno dhaqan iyo nuguur gumeysi oo aan jeclaanno isaga iyo dhaqankiisa, marka aan qaadno «guntinta la weynaanta». Guntinta la weynaantu waa tan ugu xun, waa qofnimo ka tag, waa cudur 'gun' kaa dhiga, cudurkaas waxaa daawo u ah «garashada Iskaa wax u qabso ee ah isaqoonsi ummadnimo. Waxay kugu beeraysaa isla weynaan ummadnimo, iyo la weynaanta dhaqankeeda iyo suugaanteeda. Taas macnaheedu waxaa weeye xorriyada iyo madax-bannaani ummadnimo ee dhab ah.

Imaatinkii gumeysiga iyo markii uu dhaqankiisa ina ku faafiyey ka hor, dadkeennu ayagaa isku fillaa oo isku tashan jirey. Kaalmo dibedda ah may aqoon oo cid kale wax kama sugi jirin, iskumana hallayn jirin. Dhaqaale ahaan in kasta oo uu bilaw ahaa dadkeennu xor bay ahaayeen, sidaas daraadeed, siyaasadooda waa u madax bannaanaayeen.

Isku halayn aad cid kale isku hallaysid waxaa loo arki jirey gunnimo. Gunnimo waa baryo, baryana waa dullinimo iyo dhaawac sharafta kaa gaara. Kaalmo dibedda laga sugo iyo gacma dhigad mujtamaceenna waxay ku ahayd ceeb iyo wax qalaadoo debedda ina ka soo galay, waxaa jira degmooyin badan oo dalkeenna ka mid ah ee qofku ka doorto dhimasho inuu cid kale baryo ama isku haleeyo.

Waxay aabbayaasheen qabeen: «qofku ma dhamma ilaa uu wax dhaqdo oo qoyska wax ku soo kordhiyo, sidaas awgeed, aabbuhu wuxuu ilmihiisa ku barbaarin jirey inay wax tacbaan oo isku tashadaan. Markuu ilmuhu dhasho, aabbuhu neef (Geel ah, ama ari ah ama lo'ah) ayuu ku xuddumi jirey. Macnaha tarabbiyadda ah ee ku jirey «xuddun-xirkaa» wuxuu ahaa in qofka lagu abuuro «lexejeclo» iyo in loo sameeyo aasaas uu wax ka tacbo si uu isgu fillaado.

Qofkii ka baaqsada arrintaas waxaa loo yiqiin «tacablaawe» ama dhaqanlaawe. Tacablaawe lama tixgelin jirin, la lamana tashan jirin. Beesha waa ka fongoornaa ilaa uu wax tacbo oo qoyska wax ku kordhiyo, dad iyo duunyaba. Waxay ilmahooda kula dardaarmi jireen: «Maandhow» saddex Ilaahay kaama yeelo, wuuse awoodaa:

b) Ilaahow guursan maayee hay goblamin;

t) Ilaahow cibaadaysan maayee hay cadaabin;

j) Ilaahow xoogsan maayee hay xoola tirin.

Saddexdaas Ilaahay waa awoodaa kaamase yeelo. Ujeeddada laga leeyahay dar daarankaas waxaa weeye: wixii aad doontidba adaa isu haya. Haddii aad ubad doontid adaa isu haya, haddii aad xoola doontid adaa isu haya, haddii aad janno doontid adaa isu haya.

**2. Isku kalsoonaan, isku tasho.**

Inkastoo isku tashi iyo isku fillaan ay ku dhafnaayeen dhaqankeenna, haddana heerkoodu ma dhaafsiisnayn qof qof ama qoys qoys. Qof iyo qoys waliba gaarkiis ayuu isugu tashan jirey, asagoo aan kaashan dadweynaha.

Isku tashi waa jirey, laakiin ma ahayn mid dadweyne, ee wuxuu ahaa: mid kali keli ah. Fikirka ah: Isku tashi ummadnimo ma horumarsanayn, garaadka dadkuna wax weyn kama shishayn xudduudda qofka iyo qoyska. Garaadka sidaas u koobani wuxuu sababay in aan muddo dheer (qarniyaal badan) ku soo jirney «dambayn» iyo dibudhac, oo aan horumarkii dunida dib uga hakanay.

### 3. Jiifka Jiif baa kaaga horreeyey.

Isla waayahaas, waxaa kale oo soo galay dhaqankeenna garaadka ah «waayo sugidda». Sheekada gaaban ee soo socota ayaa ina tusaysa in uu jirey macnaha ah «waaya sugid».

Waxaa la wariyey in nin socota ahi u yimid nin geed hoskiis jiifa, mar-kaasu ku yiri: «Maxaad u jiiftaa?» Ninkii jiifay baa jawaabay oo yiri: «Oo maxaan sameeyaa?» Shaqee!», kii socotada ahaa baa yiri. Maxaan helayaa haddaan shaqeeyo?» «Xoolo», socotadii baa u celiyey. Dabadeedna maxaan helin?, ninkii jiifey baa yiri, waad guursan oo carruur baad dhali, oo wax baad dhaqan.» Socotadii baa u celiyey. Ka dibna maxaan heli?, asagoo weli jiifa ayuu su'aal ku celiyey. Waad nasan oo waad ku seexan, socotadii baa u jawaabay. «Oo haddaaban hurdaaye! maan iska jiifo oo nasiibkayga sugo». Dhawr iyo toban sanno ka dib ayaa nin kale oo socota ah la kulmay ninkii geedka hooskiisa hurday oo macaluul la kici waayey. Markaasuu salaamay oo yiri, «bal iska waran, sidee tahay?» «War dhafoor buu ku yaal», jiifaa ku yiri. Ninkii socotada ahaa baa intuu dhaqaaqay yiri, «Wallee jiifka jiif baa kaga horreeyey!! Macnuhu waxa weeyey markii aad yarayd maad shaqayn oo iskuma tashan. Haddii aad isku tashan lahayd maanta sidaan ma'ahaateen.

### 4. Dawladda gacan weyn.

Waxaan niri isku hallaynta cid kale laysku halleeyo waa wax qalaad oo dibedda inaka soo galay. Sidee naloo geliyey? Markii gumaysigu yimid dhulkeenna, wuxuu degey meelo ku yaal Magaalooyinka dhexdooda iyo debeddooda.

Gumaysigu wuxuu soo shiriyey dadkii degganaa meelahaas iyo kuwii ka ag dhowaa. Wuxuu siiyey wax uu ku magacaabay «hadiyado iyo kaalmo»; carruurtiina wuxuu u daadiyey nacnac iyo macmacaan kale. Muddo yar ka dibna wuxuu abuuray dad mushahaar qaata oo magaalada iska jooga shaqana aan qaban (aan wax soo saarin): duqay, ilaalo, afmiinshaar mushahaar qaata, iwm.

Carruurtii waxay bilaabeen inay yiraahdaa: «Sinyoorow Baqshiish», odayaalkiina «Saab». Qofkii cad oo la arko sidaas

ayaa loogu yeeri jirey, inta badan. Gumaysigu ujeedo «barbaarin» ah ayuu ka lahaa arrintaas, waxay ahayd in uu ku abuuro dadka caqligooda iyo caadifadooda la weynaanta gumaysiga. Barbaarinta noocaas ah waxa looga jeeday inay ku abuurto dadweynaha:

1. Hoosayn liidnimo iyo gumaysiga oo loo arko wax weyn oo wax kasta heli kara, dadkuna isu arkaan wax hooseeya oo aan wax qaban karin;
2. Ra'yi xun oo dibusocod ah iyo afminshaarnimo; ra'yigaas wuxuu ahaa in dadka reer magaalka ahi ismoodaan, loona maleeyo dad aan shaqeyn, nolosha reer magaalnimadana loo maleeyo inay tahay shaqo la'aan Ra'yigaasi wuxuu ku badnaday haweenka.
3. Fikrad ah isku hallayn iyo waayo sugid.
4. Baryo iyo isku tashi la'aan.

Arrintaasi waxay u soo gudubtay oo dhaxlay dadkii Soomaalida ahaa ee maamulayey dawladihii kala dambeeyey Kacaanka ka hor. Baryadii, isku tashi la'aantii iyo isku hallayntii waa ballaaratay, waxayna noqotay mid dadyowga dunidu inagu xantaan. Magicii ahaa «Qabrigii Kaalmada Ajnabiga» wuxuu ahaa dheg xumo inoo soo jiiday magac xumo la wada xasuusan yahay.

Barbaarinta noocaas ah raad weyn bay ku yeelatay burjuwaasiyaddii talada dalka qabatay gobannimada kadib, ilaa Kacaankii 21 Oktoobar ka curtay. Waxay noqotay inaynu ku noolaano kaalmo shisheeye oo markii la helana la kala xado.

Halkaas waxaad ka garan kartaa sida magaceenna ay u dileen afminshaaradii caalamiga ahaa ee waddankeenna u talin jiray. Tilmaantii run ugu dhawayd ee lagu tilmaami karay bulshada Soomaaliya maamulkii dawladihii dibusocodka ahaa wuxuu ahaa:

### 5. Boqortooyadii Mallayga ahayd ee ku dhex noolayd badweynta Xuudka ah !

Mallayga waxaa lagu yaqaan in kan weyni (xoogga badan)

kan yar liqo ! xuudkuna kan yar iyo kan weynba waa isla wada liqaa !!

Mallayga weyn oo wax liqi jiray wuxuu ahaa **gumeysiga cusub** oo ku soo gabbaday maalqabeenkii yar-yarka ahaa ee lagu tallaalay fikradda hantigoosadka, oo doonayey inay maalin iyo habeen noqdaan hantigoosad, la tartama «Roog Fillar»; badweynta xuudka ahna waxay ahayd nidaamka **Imberiyaaliga Caalamiga ah** ee isla wada liqay mallayga yar iyo kan weynba: Maalqabeenka iyo dadweynaha shaqeeya.

Shaki ma leh in arrintaasi lahayd xanuun iyo fool xumo weyn, ayadaana ku dhaqaajisay ciidamada qalabka sida iyo dadweynaha horusocodka ah inay Kacaan sameeyaan ay kaga saarayaan ummadda Soomaaliyeed badweynta xuudka iyo halaqa ah. Wuxuuna la yimid Kacaanku mabda' horusocod ah iyo fikrad lagu hirgelinayo mabda'aas. Mabda'u waa Hantiwadaagga Cilmiga ah, fikradduna waa Isaa Wax U Qabso.

Sidaas awgeed, Iskaa Wax U Qabso waxay ka soo dhex baxday wadci (xaalad) xun ee dadkeennu ku noolaa waxaana keentay baahida loo qabay sharaf ummadnimo, xorriyad, madaxbannaani iyo nolol barwaaqa leh. Waxaa la ogyahay inaan waxyaalahaas oo dhan cidina ku siin karin. Waxaa lagu gaari karaa oo kaliya inaad iskaa wax u qabsatid ummad ahaan oo aad isku tashatid, inaad qaadatid «fikradda Iskaa Wax U Qabso». «Isku taashi» waa qayb weyn ee ka mid ah macnaha guud Iskaa wax u qabso. Macnaha ay kugu duwayso tiraabka «Isku tashi» oo ay ku garansiinayso waxaa weeye, haddii la soo koobo:

1. Soo noolaan iyo baraarug dadweyne uu ku baraaugu siduu yahay iyo runtiisa taagan markaas;

2. Diidmo dhaqan shisheeye (gumaysi); waa inaad korisaa dhaqanka ummaddaada oo aad ku faantaa;

3. Inaad ogaatid inaad adigu tahay kan daaweeyn kara dhibaatadiisa; oo aad rumaysid in taasi tahay xilkaaga gaarka ah (Ummadnimo), ayna waajib tahay in ummaddo xilkeeda gaaddo;

4. Inaad baabi'isid caadada ah: **caadaqaatanimo, muddamdamnimo** iyo hayeeshaale oo aad ku beddeshid hufnaan hal-adayg. Marka aad joogtid gola shisheeye iyo karti wax lagu la soo baxo;

5. Waa inaad goysid oo fogeysid isku hallayn aad cid kale isku hallaysid oo aad maskaxda ka saartid in cid kale mushkiladaada daaweyn karto adoo muujinaya niyad ahaan isku tashi iyo fal wax dhisa;

6. Inaad had iyo jeer madaxa ku haysid inaad adigu tahay kan qaddiyadiisa meel marin kara, oo aad xaqiijin kartid ujeeddada ummaddaada. Miitaal: waa inaad rumaysid inaad mideyn kartid dalalka Soomaaliya oo aad dhisi kartid Soomaali weyn;

7. Inaad leedahay shucuur isla weeyne iyo madax-bannaani ummadnimo, oo ku shaqaysid inaad gaartid isku fillaansho dhaqaale, **dhaqan** iyo **difaac;**

8. Inaadan waxyaalaha qalaad (ajnabiga ah) isaga raacin indha'le'i dhegali'i. Waa inaadan iska rumayn fikradaha dadka kale oo aadan wada liqin, laakiin waa inaad faaqiddaa oo kala shaandhaysaa. Dadka reer Afrika waxaa lagu xantaa inay ku dayasho badan yihiin oo waxay maqlaan ama akhriyaanba rummeeyaan oo wada qaataan; dadka reer Yurubna waxaa la yiraahdaa waa faaqiddaad badan yihiin. Sidaasay yiraahdaan qorayaalka gumaysigu. Laakiin waa been oo waa dicaayad;

9. Inaad u istaagtid waddankaaga inaad ku dhistid si waafaqsan dabeecadda **dhaqankiisa** iyo **dhaqaalihiisa** adoo kaashanaya **maskaxdaada** iyo **tabartaada;**

10. inaad lahaatid shucuur iyo garasho ah wada tashi, kala dambayn iyo in loo haggaansamo maamulka suuban kan xunna la dooriyo durba;

11. inaad ka qiyaastid socodka horumarka dalka sida aad adigu u shaqaysid. Waa inaad jeclaatid meheraddaada, oo aad laballaabtid shaqadaada oo aad dadka ka-

le (Jaallayaalka) walaalaysatid. Ogow muran iyo isafgaran-waa ka dhex dhaca adiga iyo jaalle kale inay wax u dhimayaan horukaca dalka iyo midnimadiisa.

Haddii ereyo gaagaaban lagu dhaho, Iskaa Wax U Qabso waa «isku tashi» aad meel kasta isaga tashatid. Xagga dhaqaalaha, waa inaad u halgantid inaad gaartid isku fillaan dhaqaale buuxa oo loo siman yahay; xagga dhaqanka, waa in la helo aqoon; dadweyne oo dhammays ah oo u shaqaysa dadweynaha shaqeeya; xagga siyaasadda, waa maamulka iyo hoggamin dadweyne ee horusocod ah oo sal iyo baar iswaafaqsan leh, markastana u hiillisa danaha guud ee dadweynaha, ayadoo rumaysan inayan jirin awood ka weyn oo ka sarreysa tan shacabka, shacabkuna wuxuu doono uu qabsan karo; xagga difaaca, waa inaad ku tashatid xogga ummadda. Waa inaad leedahay difaac dadeyne oo horumarsan awoodna uu leh inuu jabiyo cadaw kasto; xagga bulshada, waa sinnaan, caddaalad iyo isxaq dhowr.

Sidaad haddii aan yeello shaki ma leh inaan gaarayno dadyowga ina ka horreeya oo haddana aan dhaafayno.

## Casharka 9aad

# CANSHUURAHA

Canshuurtu waa lacagta si sharci ku dhisan looga ururiyo dadka, waxayna ka mid tahay meelaha ugu waaweyn oo ay ka timaaddo lacagta dawladda soo gasha, taasoo ah waajib qof kasta dusha ka saaran, inuu bixiyana lagama maarmaan ay tahay. Maxaa yeelay, Canshuurta waxay kaalin weyn kaga jirtaa dhismaha dhaqaalaha waddanka iyo horumarintiisa, lacagta ka timaadana waxaa iska leh ummdda iyada ayaana danaheeda lagu fuliyaa.

Sida runta ah qofkaliya ama koox kaligeed ma dhisi karto dhaqaale ballaaran oo ummad baahideeda oo dhan lagaga bixi karo, wawaana marna laga fursanayn in si wadajir ah looga qayb galo arrintaas.

Waxyaalaha iyo meelaha canshuurta laga qaado waxaa tilmaamaya sharciga canshuuraha u degsan. Isagoo sheegaya siyaalaha iyo qiimaha kala geddisan ay leedahay. Waxaad ogaataa in wax alla wixii ganacsi ku saabsan laga qaado canshuur,

nooc kasta oo ganacsi ahna inta lagu canshuurayo waxaa u degsan sharci. Makhaayadaha, Dukaamada, Shineemooyinka, iwm., waa la canshuuraa. Iibka cunnada, dharka, alaabada, waxaa laga qaadaa canshuur. Badeecadda waddanka laga dhoofiyo iyo tan dibedda laga keeno, waa la canshuuraa. Waxyaalaha ay dadku leeyihiin faa'iidaduna ka soo gasho waxaa ku socota canshuur. Sida daaraha, warshadaha, beeraha, iwm.

Canshuurta faa'iidada waxaa laga qaadaa shirkadaha sharciga ku dhisan iyo wakaaladaha dawladda ee madaxdabannaan qaarkood.

Mushaaharooyinka dadku qaataan waxaa ka go'da canshuur. Canshuuraha noocyadoodu way badan yihiin, hasa yeeshee waxa laga qaadaa ganacsi oo dhan iyo wax alla wixii faa'iido dadka ka soo gala.

Canshuurta laga ururiyo ummadda waxaa lagu bixiyaa barnaamijyada loogu tala galay horumarinta dalka xag kastaba. Aan sheegno meelaha qaarkood ee cashuurta lagu bixiyo:

1. Mashaariicda kordhinta tacabka Beeraha oo ay ka mid yihiin ballaarinta dhulka la beero, kaliyo qaadi kara biyo ku filan waraabinta, kala noocaynta tacabka beeraha, la dagaalanka cayayaanka cudurada u keeni kara abuurka, daryeelidda beeraleyda iyo kaalmayntooda. Waxaa kaloo lacagta canshuuraha lagu bixiyaa:

2. Barnaamijyada warshadayta, taasoo inoo suura gelinaysa in dad badan oo cadilan aynu shaqo u hello, isla markaana ina gaarsiinaysa inaynu ka kaaftoonno waxyaala badan oo dibadda inooga yimaada, oo aakhiritaanka gaarno isku fillaan. Fulinta mashariicda warshadaynta waxay u baahan tahay in xoolo badan lagu bixiyo, hase yeeshe faa'iidooyinka ay keenaan ka dib markii ay hirgalaan waxay ku soo noqdaan dadweynaha.

3. Horumarinta waxbarashada si loo gaarsiiyo dadka oo dhan ,yar iyo weynba. Arrintaasna waxay doonaysaa in dugsiyo badan la dhiso meel kastana la gaarsiiyo, si ardayga magaalada jooga iyo kan tuulada fog joogaa tacliin isku fil ah u wada helaan. Dhismaha dugsiyada waxaa garab socota diyaarinta Macallimiintoodii oo loo diyaariyo.

4. Daryeelidda caafimaadka dadka, taasoo ah in ayna waayin daawooyinka waqti kasta ay u baahdaan, kana helaan meel kasta oo ay joogaan, haddaba waa in la diyaariyo cusbitaalladii, daawooyinkii iyo dhakhaatiirtii.

5. Dhismaha ciidanka hubka sida ee ummadda, kaasoo loo baahan yahay inuu noqdo mid laxaad leh oo jilibka u dhiggi kara qof alla qofkii ku xadgudba qarannimada Soomaaliyeed, lana doonayo inuu had waliba joogo heerka ugu sarreeya xagga hubka iyo xagga tababarka xeesha dagalka.

6. Maamulka dawladda ee xubnaha aad u badan leh iyo ilaalinta nabadgelyada, arrinmahaasoo u baahan Xafiisyo, qalabkii lagu shaqayn lahaa, iyo ciidankii ku shaqayn lahaa.

7. Dhismaha mashaariicda faraha badan ay ka mid yihiin: Jidadka, oo aad u sahlaya isgaarsiinta gudaha Ceelasha, Barkadaha oo iyaguna ka badbaadinaya xoolaha inay oon u dhintaan waqtiyada abaarta.

Gabagabayntii waxay tahay in lacgta dawladda ka soo gasha canshuuraha lagu bixiyo, wax kasta oo dan u ah dadweynaha. Waxaa waajibkuna yahay in ruux kastaba bixiyo canshuuraha, isagoo tixgelinaya arrimaha aan soo sheegnay, waxaad ogaataa in canshuuraha oo keliya ku filnayn fulinta mashaariicda faraha badan ee lala kaashado wixii ka soo baxa ilaha kale ee dhaqaalaha.

**WEYDIIN**

1) Waa mxay canshuurtu ?

2) Lacagta casnhuurta ka timaada ayaa bixiya ? Yaa iska leh ? Yaase danahooda lagu fuliyaa ?

3) Wax inooga tilmaan waxyaalaha iyo meelaha canshuurta laga qaado..

4) Canshuurta faa'iidada maxaa loola jeedaa?

5) Canshuuraha bixintooda maxaa waajib ka dhigay?

6) Wax inooga sheeg waxyaalaha danaha dadweynaha ah ee lacagta canshuurta lagu fuliyo.

7) Canshuuraha kuma filna fulinta mashaariicda badan, waa maxay waxyaalaha kaalmeeya?

## Casharka 10aad

# MEELAHA LAGA KORDHISTO AQOONTA GUUD

Barashada aqoonta guud aad ayey muhim ugu tahay qof kastaba. Maxaa yeelay qof kasta wuxuu ka mid yahay bulsho bulsha kastana waxay ka mid tahay bulshadaha adduunka. Sidaas darteed ayey lagama maarmaan u tahay in laga dhigo meelaha lagu barto aqoonta guud qalabkii loogu jeedin lahaa dadweynaha wax alla wixii cusub ee dhaca adduunka.

Siiba wixii ku saabsan xagga horumarka iyo wixii goodi u keeni kara nabadda adduunka iyo wixii aqoon ah ee aadamiga ka dhexeeya. Waxyaalahaas aan soo sheegnay waxay xoojiyaan xiriirka ka dhexeeya dadweynaha iyaga oo mideynaya afkaartooda wanaagsan, siinaysana foojignaan, iskaashi, wax wada qabsi. Waxaana ka mid ah meelaha aqoonta guud laga shuruudaha soo socda:

## 1. WARGEYSKA:

Wargeyska aad ayuu muhim u yahay xagga kordhinta aqoonta guud, faafinta afkaarta wanaagsan iyo isgaarsiinta arrimaha gudaha iyo kuwa dibaddaha, waa in laga helaa wargeyska daha soo socoda:

1. inuu heegan u ahaado faafinta afkaarta wanaagsan.

2. Inuu ka fogaado qorriinka wax alla wixii dhibaata u keeni kara danaha dalka.

3. Inuu ku dadaalo qorriinka wax alla wixii u suuro gelinaya dadweynaha waxyaalaha soo socda:

   Mideynta afkaartooda wanaagsan, foojignaan, sinnaan, caddaalad, is-ixtiraan isku kalsoonaasho, iskaashi, isaga oo isla markaasna uga digaaya wixii ka soo horjeeda waxyaalahaas. Sidaas darteed waa inuusan u noqon dabasocod dadyow ka soo horjeeda danaha dalka.

4. Inuu goor iyo ayaan wax ka qoraa dhibaatooyinka dalka, isla markaasna faallo ka bixyaa sida looga gudbi lahaa dhibaatooyinkaas, gaarahaan xagga dhaqaalaha, siyaasadda daryeelka, waxbarashada iwm.

5. Waa inuu xil iska saaro wax-ka-qorista dhibaatooyinka adduunka ka taagan si ay dadku ula socdaan hawlaha adduunka.

6. Waa inuu xiriir la yeeshaa xarruumaha lagu baaro cilmiga isagoo u soo badhigaya wixii horumar ah ee la gaaro, xagga caafimaadka, sayniska, teknoloojiga. Intaas waxaa u weheliya wargeyska Soomaaliyeed inuu xil iska saaro caddeynta mabda'a hantiwadaagga, ololayaasha tawriga ah ee kala geddisan iyo hawlaha dalalka maqan ee Soomaaliya.

## 2. RAADIAYHA

Raadiyuhu wuxuu ka mid yahay meelaha ugu muhiimsan ee laga kordhisto aqoonta guud. Raadiyuhu wuxu fidiyaa hadal, hadalkana qof kasta ayaa ka faa'iideysan kara ama ha yaqaan akhrinta ama yuusan aqoonine, waxaa kale oo qiima weyn u yeelay Raadiyaha xagga faafinta aqoonta inay u suuroobi karto qofka ka hadlaaya inuu si dhib yar u saameeyo dadka dhegeysanaya meel kastaba ha jooggeene isaga oo ku hadlaaaya hadal macaan oo ku dhiirriya qofka inuu tixraaco waxa laga sheegi raadiyaha.

Waase in laga helaa raadiyaha shuruudaha soo socda:

1. In laga abaabulo raadiyaha barnaamijyo ku saabsan dhinac kastaba ,dhinaca siyaasadda, bulshada, dhaqaalaha, waxbarashada iyo dhaqanka, iyada oo la tixgelinayo:

   b) aqoonta dadka ee kala sarreeysa.
   t ) aqoonta dadka ee kala geddisan.

Sidaas darteed, qof walba waa inuu ka helo raadiyaha Barnaamij ku toosan heerka ay aqoontiisu gaarsiisan tahay iyo waxay aqoontiisu tahay.

2. Barnaamijka raadiyaha waa inuu xil iska saaro wixii ku saabsan yididiilada iyo dhibaatooyinka ummadda.

3. Waa in Raadiyuhu yeeshaa Barnaamijyo Maaweelo iyo Madadaalo leh. Sidaas darteed waa in lagu dadaalo sida ugu dhib yar ay dadka intiisa badani ay ku helaan Raadiyaha.

3. **Shineemada iyo Riwaayadaha:**

Shineemada iyo Riwaayaduhu qayb weyn ayey ka qaataan kordhinta aqoonta dadweynaha. Maxaa yeelay waxaa u suuro-obi karta dadka iyaga oo kaashanaya shineemada iyo riwaaya-daha inay ku arkaan indhahooda fekradaha wanaagsan ee loo-gu soo ban dhigay si fudud, oo qof waliba garan karo, sidaas darteed ayey xukuumaadka waddaniga ahi, markay ogaadeen kaalinta ay kaga jiraan shineemada iyo riwaayaduhu sare u qaa-didda aqoonta dadweynaha, isu soo dhowaanta afkaartooda, ayey xil iska saareen haggaajinta maamulka aflaanta iyo Barna-amijyada riwaayadaha. Shineemada iyo riwaayaduhu si ay u gutaan waajibkooda waa in ay ku dadaalaan sidii ay u xaqiijin lahaayeen ujeedooyinka soo socoda:

1. Inay u soo ban dhigaan dadweynaha nolodha siyaa-sadda ee lagu maamulo dalka markas si sahlan oo qofka caadiga ahi garan karo, iyaga oo muujinaya xumaanta iyo wanaagga inay muujiyaan qiimaha ay u nac waliba, siiba waa inay muujiyaan qiimaha ay u leedahay Dimuqraadiyada nolosha qofka qoyska iyo ummaddaba.

2. Inay ugu soo ban dhigaan dadweynaha si fudud hi-milooyinkooda iyaga oo tilmaamaya sidii lagu gaari lahaa.

3. Waa inay u noqdaan dadka maaweelo iyo madadaalo si uu qofka uga faa'iideysto waqtigiisa firaaqada ah.

**Dalxiiska.**

Dalxiisku wuxuu ka mid yahay meelaha muhimka ah xag-ga kordhinta aqoonta guud, wuxuuna xoojiyaa xiriirka ka dhe-xeeya dadka ummad kastaba iyo kan ka dhexeeya ummaddaha adduunka oo dhan. Aqoon kororsiga dalxiisku waxay salka ku haysaa booqasho, tusaale ahaan haddii aad booqasho ku tagtid

dalka Masar, waxaa kuu suuroobi inaad soo baratid dalka iyo dadka Masarba sida ay u noolaan jireen iyo sida ay u noolyihiin maanta, isla markaasna waxaa kuu suuroobi markaad dalkaaga ku soo noqotid inaad aqoon ka siidid saaxiibayaalkaagii Soomaalida ahaa dalka Masar, dadkii Masar ee soo baratayna waxaad aqoon ka siinaysaa dadkaaga. Sidaas darteed dalxiisku wuxuu xoojinayaa saaxiibtinimada dadowga adduunka iyo nabadgelyada dunida. Xaggaa dalka gudihiisana markii aad ku tagtid booqasho meelaha taariikhiga ah waxaad garan kartaa sida ay dadka Soomaaliyeed ku noolaan jireen.

Sidaas oo kale haddii aad booqasho ku tagtid meelaha warshadaha waxaad garan kartaa heerka ay dadka Soomaaliyeed ka gaareen xagga horumarka gaar ahaan; horumarka deg deg ah ee la gaaray intii ka dambaysay kacaankii barakaysnaa Akhriska.

Wax akhrisku aad ayuu muhiim u yahay xagga sara u qaadidda aqoonta dadka, waxaana laga garan karaa bulsha kastsa heerka ay ka gaartay horumarka aqoonta, hadba sidii uu dadweynahoodu wax u akhristo iyo hadba sidii ay kutubtu ugu badan tahay suuqa, Buuggu wehel wanaagsan ayuu qofka u yahay, sidaas darteed qof kastsa waa inuu suuqa ka helo kutub uu jeceel yahay akhriskeeda, taasoo tixgelinaysa aqoonta dadka ee kala geddisan iyo kala sarreeynteeda iyo iyagoo la badiyo meelaha wax lagu akhristo. Waxaad ogaatay murtidii ahayd «Wax akhrisku qofka wuu sameeyaa»? Sidaas awgeed arday waliba ardayguu ka akhriss badan yahay ayuu ka wanaagsan yahay, wuuna ka aqoon ballaaran yahay, ardayga fiican waa kii aan kala bakhaylin lacagta inuu ku iibsado wuxuu akhristo.

**WEYDIIN:**

1) Tilmaan shuruudaha laga rabo wargeyska wanaagsan.

2) Sheeg waajibka ka saaran wargeyska Soomaaliya xagga waxyaalaha soo socda:
   b) Mabda'a hantiwadaagga.
   t) Iskaa wax u qabso.
   j) Ololayaasha tawriga ah ee kala geddisan:
   x) Hawlaha dalalka maqan ee Soomaaliyeed.

3) Haddii uu wargeysku dabasocod u yahay gumaystayaashu, maxay tahay dhibaatooyinka uu u soo jiidi karo dalka?

4) Raadiyuhu si dhib yar ayuu ugu gudbin karaa aqoonta dadka. Ka faallo?

5) Sidee bay riwaayadaha iyo Shineemadu u gudbin karaan afkaarta wanaagsan?

6) Dalxiisku wuxuu kordhiyaa saaxiibtinimada dadyowga adduunka. Ka bixi faallo gaaban?.

7) Wax akhriska waa caado la doonayo in arday waliba yeesho, ka sheekee faa'iidada AKHRIS badnaanta.